**1: "Qofna markii uu dhalanayay ma uu dooran midabkiisa, nasabkiisa, hantidiisa iyo cidda uu noqonayo; ee haddii aadan abuurka ixtiraamayn, abuuraha ixtiraam."**

—Sheekh Axmed Diidaat

**2: "Cadowga ugu weyn ee Islaamku waa muslimka jaahilka ah. Kaas oo xanaaqiisa iyo xamaasadiisa ku samaynaya, falalka sumcad-darrada usoo jiidaya Islaamka. Dadka kalena marka ay arkaan, waxay moodayaan inuu Islaamku yahay isaga oo kale."**

—Sheekh Axmed Diidaat

**3: "Anigu Muslim baan ahay, Islaamkuna waa diin dhamaystiran. Laakiin, anigu ma ihi insaan dhammaystiran. Haddii aan gef ku dhaco Islaamka ha canaananina, ee aniga i canaanta."**

—Sheekh Axmed Diidaat

**4: "Qofka gudaha ka wasakhaysani, ma suuraysto in ay jiraan dad wanaagsani."**

—Sheekh Axmed Diidaat

**5: "Dadka kuwa ugu dhaqanka xumi waa, kuwa marka ay kaa cadhoodaan wanaaggaaga inkira, sirtaada faafiya, noloshaadana diida, wax aanad ahaynna kaa sheega."**

—Sheekh Axmed Diidaat

**6: "Annagu ma nihin, kuwa ka dib dhacsan reer Galbeedka. Balse, waxaynu nahay kuwa ka dib dhacsan Islaamka.**

**Caalamka waxaan ugu harnay, ka dib markaan ka tagnay Diinteena."**

—Sheekh Axmed Diidaat

**7: "Waa in aad Ilaahay ka filataa, wax aanu garaadkaagu sugayn. Ilaahay wax walba wuu awoodaaye."**

—Sheekh Axmed Diidaat

**8: "Joogiddaada iyo la'aantaadu, Islaamka waa iskugu mid. Balse, adigu Islaamka la'aantii waad lumaysaa."**

—Sheekh Axmed Diidaat

**9: "Islaamku adiga la'aantaa wuu guuleysanayaa, laakiin adiga Islaamka la'aantiis waad khasaareysa."**

—Sheekh Axmed Diidaat

**10: "Waxaan aaminsanahay in Alle yahay ka kaliya ee wax abuura, wuxuu na noo soo diray rasuullo iyo nebiyo, si ay noo hagaan."**

—Sheekh Axmed Diidaat

**11- Haddii Aadan Awoodin Hadal Xaqa ah, Ha u Sacaba Tumin Baadilka (Xumaanta Iyo Gardarada).**

—Shiikh Mohamed Metawali Shacraaw

**12- Haddii Aadan Helin Ruux Laabta Xumaan iyo Xiqdi Kugu Haya, Ogoow inaad Tahay Ruux Fashilmay.**

—Shiikh Mohamed Metawali Shacraaw

**13- Ruuxna Xukmin Maayo Boqortooyada Alle, ilaa Eebe Doonistiisa Mooyee.**

—Shiikh Mohamed Metawali Shacraaw

**14- Ha u Caabudin Eebe inuu wax ku siiyo, ee u Caabud inuu kaa Raali noqdo, Haddii uu kaa Raali Noqdana Waxaad Si Durdur ah U Heleysaa Siismadiisa.**

—Shiikh Mohamed Metawali Shacraaw

**15- Haddii Aad Ku Aragtid Ruux Faqiir ah Wadamada Muslimiinta Dhexdooda, Ogoow in Mid Hantiile Ah Uu Xaday Ninkaa Maalkiisa.**

—Shiikh Mohamed Metawali Shacraaw

**16- Ma Wal-walo Ruuxa leh Aabe, Sidee buu u Wal-wali Ruuxa leh Rabbi.**

—Shiikh Mohamed Metawali Shacraaw

**17- Haka Wal-walin Waxyaabaha ay Basharka kuu Maleegayaan, Haddii ay Fogaadaan waxay Fulinayaan Amarka Eebe.**

—Shiikh Mohamed Metawali Shacraaw

**18- "Aqoonta dhabta ahi sinaba ugama hor timaado diinta, ee waa u caddayn iyo xaqiijin."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**19- "Warbaahintu waxa ay u tartantaa, sidii ay ruuxa naftiisa uga xadi lahayd."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**20- "In aad shakhsiyadaada ixtiraamto, waxaa kamid ah; in aad ka dheeraato dadka aan qiimigaaga garanayn."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**21- "Haddii aanay dhallinyarada noloshooda samaysan, kuwa kale ayaa nolol ay samaysteen, qaadashadeeda ku qasbaya."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**22- "Aadamahu waxa uu aadame kale kaga sarreeyaa, baaritaanka xaqiiqada."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**23- "Aqoonta maadiga ahi guriga way inoo ifisay, garaadka se inooma ifin."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**24- "Ogow waxaad kamid tahay boqorrada adduunka dushiisa ku nool, ee u mahadnaq Allaha ku abuurtay ee xisaab la'aanta kugu siiyay nimcada weyn ee aad maanta haysato."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**25- "Dadku waa ay isbeddel badan yihiin, ee qiimigaaga ha ka dhex raadin wajiyada dadka."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**26- "Aadamuhu waxa uu aadame ku noqdaa, iska caabinta waxa uu jeclaysto iyo xamilista waxa uu neceb yahay."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**27- "Sida harraadkeenu u xaqiijinayo in ay biyo jiraan, ayay caddaalada aynnu raadinaynaa u xaqiijinaysaa, in uu caddaali jiro."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**28- "Xatooyada boqorrada, magaceeda hufani waa cashuur."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**29- "Waxa kaliya oo aad diin ku yeellan kartaa, waa aqoon, oo ilaahay jaahilnimo laguma caabudo."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**30- "Naftaadu waa markabkaaga, oo haddii aad adigu fuushana waad badbaadaysaa, haddii ay iyadu ku fuushana waad halaagsamaysaa."**

—Dr. Mustafa Kamaal Maxamuud

**31: "Qofna kuma siinayo madax-bannaani. Qofna kuma siinayo sinnaan iyo wax kale toona. Haddii ay ragganimo kugu jirto, adiga ayaa qaadanaya."**

—Malcom X.

**32: "Libinta ama guusha koox baa kugu nacaysa, hungawga ama guuldarada qaar ayaa kugu nacaya, ee markastaba is mooganaysii."**

— Malcom X.

**33: "Dadku waxa aanay ka wada warqabin, in kitaab kaliya (Qur'aanka) uu nolosha adduunka oo dhan beddeli karo."**

—Malcom X.

**34: "Haddii aanay jirin dad ku dhaliila, ogow in aadan libin, ama guul hanan."**

— Malcom X.

**35: "Tallaabada koowaad ee guusha ama libintu, waa in aad diidaa in aad isku dhiibto duruufta kugu xeeran."**

—Malcom X.

**36: "Markii akhlaaqdii luntay waxa aynu maraynaa, heer qofku hadalkii uu subixii lahaa galabtii beeninayo."**

—Malcom X.

**37: "Warbaahintu waa awoodda ugu xoogga badan dhulka guudkiisa, waxa ay haystaan awoodda qof bilaa dambi ah lagaga dhigo dambiile iyo awoodda dambiile lagaga dhigo bilaa dambi; taasina waa awood badni. Maxaa yeelay, waxa ay xukumaan maskaxda dadka."**

— Malcom X.

**38: "Waxa aan aaminsanahay in Diinta Islaamku tahay diinta ugu fiican."**

—Malcom X.

**39: "Ahow nabad-doon hufan, qaanuunkana raac, dadkana wada qaddari, ka kugu xad-gudbana xabaasha u dir."**

— Malcom X.

**40: "Ma rumaysni in dadka si caddaalad darro ah loo cadaadinayo ay sugaan cid kale, oo usameysa sharciyo ay kaga baxaan cadaadiska."**

—Malcom X.

**41: "Noloshu waxyaalaha ay innooga baahantahay waxa ka mid ah, in aynu noqonno run la noolayaal."**

—Malcom X.

**42 "Murtiiluhu kaalinta maadeeyaha waa uu gali karaa, balse maadeeyuhu kaalinta murtiilaha ma geli karo."**

—Malcom X.

**43: "Wanaaggaaga haka dhigin buug furan, waxa jira dad aan xaraf ka mida u qalmine."**

— Malcom X.

**44: "Haddii aanad u dhimanayn darteed, erayga "xornimo" ka saar qaamuuskaaga."**

—Malcom X.

**45:- Sida jidhkaaga oo kale ayay maskaxdaaduna u daashaa, ee ku nasi odhaahyada xikmadda leh!**

**— Hazrat Ali**

**46. Mid kasta oo raba in uu gaadho yool fog waa in uu qaado tallaabooyin yaryar oo badan.**

— Helmut Schmidt

**47. Si aad dadka u fahantid; naftaada fahan ugu horraynta!**

— Maxamud Ciraaqi

**48. Haddii aad naftaada ka shakidid, waxa aad ku istaagaysaa dhul gariiraya!**

— Henrik Ibsen

**49.. Kuuma suurtogal aha in aad ka cabsatid guuldarradu, waayo waa jidka keliya ee kugu ridaya guusha!.**

—- LeBron James

**50. Naftaada waxa aad ka dhigi kartaa mid faraxsan ama mid murugeysan, waa ay isle'eg yihiin dedaalka kaaga baxaya labadaas.**

— Ray Bradbury

**51. Ha ku xaddidin maalgashigaaga dhaqaalaha adduun. Ku maalgeli naftaada wax uun, kadibna waxaad aad abaalmarin u heli doontaa hodantinimo**

-- Charles Schwa

**52. Go'aanso waxa aad rabto, go'aanso waxa aad diyaarka u tahay in aad ku beddelato si aad u hesho. Aasaas waxyaabaha aad mudnaanta siinayso kadibna u dhaqaaq sidii aad uga shaqayn lahayd.**

— H. L. Hunt

**53. Weligaa hoos ha u dhigin madaxaaga. Mar walba sare u qaad. Adduunka indhaha indhaha u saar.**

— Helen Keller

**54. Marna dib berri ha ugu dhigin wax aad maanta awooddo in aad qabatid.**

— Benjamin Franklin

**55. Wixii aanad maanta bilaabin, weligood ma dhammaan doonaan berri.**

— Johann Wolfgang von Goethe

**56.Marka wax walba ay u muuqdaan in ay adiga kaa soo hor jeedaan, xusuuso in diyaaraddu ay kacdo iyadoo dabayshu kasoo hor-jeeddo, ma aha iyadoo dabayshu la jirto.**

— Henry Ford

**57. Waxaa ka fiican in aad saddex saacadood soo hor-dhacdo, intii aad hal daqiiqo dib u dhici lahayd.**

— William Shakespeare

**58. Ka bilow halka aad joogto. Isticmaal waxa aad haysato. Samee waxa aad awoodo.**

— Arthur Ashe

**59. Mustaqbalkaagu wuxuu ku xidhanyahay waxa aad maanta sameyso**

.— Mahatma Gandhi

**60. Waxaa jirta hal waddo oo keliya oo looga fogaan karo cambaaraynta: waxba ha sameyn, waxba ha dhihin, waxna ha noqon.**

— Aristotle

**61. Wax kasta oo aad sameyn karto, ama aad ku riyoon karto, bilow iyada. Indho la'aantu waxa ay leedahay hanadnimo, awood iyo indha-sarcaad.**

— Johann Wolfgang von Goethe

**62. Had iyo jeer samee waxa aad ka cabsatid in aad sameysid.**

— Ralph Waldo Emerson

**63. Haddii aad sameysid wixii aad weligaaba sameyn jirtay, waxa aad heli doontaa wixii aad weligaaba heli jirtay.**

— Tony Robbins

**64. Macno ma sameyneyso meesha aad ka timi. Arrinka macnaha sameynayaa waa halka aad u socoto.**

— Brian Tracy

**65. Waxa aan rumaysanahay geesinimada keliya ee qof kasta uu u baahan yahay waa geesinimada lagu daba-kaco riyooyinka adiga kuu gaarka ah.**

— Oprah Winfrey

**66. Haddii aad ku riyoon karto, waa aad gaadhi kartaa.**

— Zig Ziglar

**67. Yool aan lahayn qorshe waa rabitaan keliya.**

— Larry Elder

**68. La soco riyoodayaasha, rumeeyayaasha, dhiirranayaasha, farxayaasha, qorsheeyayaasha, dadka guulaystay ee madaxoodu daruuraha joogo lugahooduna dhulka. U oggoloow in ruuxdoodu kugu daarto dab adiga si aad dunidan uga tegtid adiga oo ka wanaagsan markii aad beshay!**

— Wilferd Peterson

**69. Haddii aanad dhibaatooyinkaaga ku soo xallin tagtadaada, ilaa timaaddadaada ayay ku daba socon!**

— Qoraha lama yaqaan

**70. Marnaba lama gaarin wax wanaagsan khatar la'aan.**

— Niccolo Machiavelli

**71. Qofna weligiis buurta kuma fuulin eegmo keliya.**

— Dr. Phillips

**72. Shalay waa ay tagtay. Berri weli lama gaadhin. Maanta oo keliya ayaa gacanta inoogu jirta. Ina keena aynu bilownee.**

— Teresa

**73. Marnaba ma fashilmi doonno marka aynu isku dayeyno in aan sameyno waajibkeenna, mar walba waa aynu fashilmayna marka aynu dayacno in aan waajibkeenna gudanno.**

— Robert Baden-Powell

**74. Qofna abid sabool kamuu noqon in uu wax bixiyo.**

— Anne Frank

**75. Isu-diyaarinta ugu wanaagsan ee berri waa u-sameynta maanta sida ugu fiican.**

— H. Jackson Brown, Jr.

**76. Weligaa haka niyad jabin wax aad maalin kasta ka fekertid.**

— Sir Winston

**77..Badi waxyaabaha muhiimka ah ee laga qabtay adduunkan waxaa qabtay dad, kuwaas oo aan joojin isku**

**deyidda marka aanay muuqan in ay wax rejo ah yeelan karaan.**

— Dale Carnegie

**78. Niyadda ha iska jebin. Badanaa waa furaha, ugu danbeeya xirmada furayaasha ka furaya qafulka.**

— Qoraha la ma yaqaan.

**79. Ma jiraan wax ka sharaf badan in aad halis noloshaada u geliso dalkaaga dartood.**

— Nick Lampson

**80. Haddii aanad diyaar u ahayn in aad halis u gasho wax aan caadi ahayn, waxa aad joogi doonta halkii iska caadiga ahayd.**

— Jim Rohn

**81. Haddii aanad qorsheysan nolosha adiga kuu gaarka ah, waxaa jiri doonta fursad ah in qof kale qorshihiisa aad ku dhacdo. Bal qiyaas waxa ay kuu qorsheeyeen? Ma badna.**

— Jim Rohn

**82. Waxa ugu muhiimsan waa in aad isku daydo in aad dhiirrigeliso dadka si ay ugu wanaagsanadaan waxa ay rabaan in ay qabtaan.**

— Kobe Bryant

**83. Waxaa jira hab ka fiican oo loo sameeyo – soo hel.**

— Thomas A. Edison

**84. 'Suurtagal' ma aha waa eray laga helo keliya qaamuuska doqommada.**

— Napoleon Bonaparte

**85. Haddii aad hayso tufaax, aniguna aan haysto tufaax, misna aan isweydaarsanno tufaaxyadaas, weli mid kasto oo innaga mid ah waxa uu heystaa hal tufaax; balse haddaad heyso fekrad anigunaaan hayo fekrad misna aan isweydaarsanno fekradahaas, ka dib mid kasto oo innaga mid ah waxa uu heystaa labo fekradood.**

— George Bernard Shaw

**86. Waxaan leeyahay falsafad aad u fudud: Buuxi wixii maran. Bannee/faaruqi wixii buuxa. Xoq meesha cuncunaysa.**

— Alice Roosevelt Longworth

**87. Ma jiro habeen iska caabbin kara qorrax soo-baxa ama dhibaato iska caabbin karta rejada.**

— Bernard Williams

**89. Socodka kuma baratid xeerar la raaco. Waxa aad ku barata socosho, iyo kufkufid.**

— Richard Branson

**90. Samee waxa aad jeceshahay, kadibna lacagtu iyadaa ku soo daba kici doonta.**

— Marsha Sinetar

**91. Habka ugu fiican ee lagu ogaado in aad aamini kartid qof waa in aad aamintid.**

— Ernest Hemingway

**85. Haddii aad hayso tufaax, aniguna aan haysto tufaax, misna aan isweydaarsanno tufaaxyadaas, weli mid kasto oo innaga mid ah waxa uu heystaa hal tufaax; balse haddaad heyso fekrad anigunaaan hayo fekrad misna aan isweydaarsanno fekradahaas, ka dib mid kasto oo innaga mid ah waxa uu heystaa labo fekradood.**

— George Bernard Shaw

**86. Waxaan leeyahay falsafad aad u fudud: Buuxi wixii maran. Bannee/faaruqi wixii buuxa. Xoq meesha cuncunaysa.**

— Alice Roosevelt Longworth

**87. Ma jiro habeen iska caabbin kara qorrax soo-baxa ama dhibaato iska caabbin karta rejada.**

— Bernard Williams

**89. Socodka kuma baratid xeerar la raaco. Waxa aad ku barata socosho, iyo kufkufid.**

— Richard Branson

**90. Samee waxa aad jeceshahay, kadibna lacagtu iyadaa ku soo daba kici doonta.**

— Marsha Sinetar

**91. Habka ugu fiican ee lagu ogaado in aad aamini kartid qof waa in aad aamintid.**

— Ernest Hemingway

**92. Waa inta lagu jiro waqtiga madow marka ay tahay in aynu diiradda saarno sidii aan u arki lahayn iftiinka.**

— Aristotle Onassis

**93. Rejadu waa awoodda lagu arko in uu jiro iftiin aanu saameyn dhammaan gudcurku.**

— Desmond Tutu

**94. Mararka qaar hirarka isbeddelka dhexdooda, ayaynu ka heli karnaa dhinaca aynu u socono ee saxda.**

— Qoraha la ma yaqaan

**95. Haddii aanay adkayn, qof walba waa uu qaban lahaa. Adaygeeda ayaa ka dhigay wax weyn.**

— Tom Hanks

**96. Haddii ujeeddada ugu sarraysa ee kabtanku ahaan lahayd in uu ilaaliyo markabkiisa, wuxuu weligiis u oolli lahaa dekadda.**

— Thomas Aquinas

**97.. Haddii aad naftaada kalsooni siisid, waxaad jiidi karta ku dhawaad wax walba.**

— Katy Perry

**98. Marka hal albaab xidhmo, miyaadan ogayn, mid kale ayaa furma.**

— Bob Marley

**99. Dhiirrigelintu waa sida quud (cunto) maskaxda la siinayo. Kagama dhergaysid hal fadhi, waa in aad ku soo noqnoqodka badisaa.**

— Peter Davies

**100. Dadka qaar ayaa sheega in aanay dhiirrigelintu dhan maanin. Hagaag, sidoo kale hadda maydhashaduna ma dhammaato, sidaa darteed ayaa la inoogula taliyaa maalin kasta in aynu qubaysanno.**

**— Zig Zigler**

**102. Ha isdhiibin. Maanta sii hawshood, berrina u nooloow sida hanad (geesi).**

— Muhammad Ali

**103. Haddii aanu wuxu kaa bajinayn, kuma beddelayo.**

— Fred DeVito

104. **Qofka keliya ee ay tahay in aad ka wanaagsanaatid waa qofkii aad shalay ahayd.**

— Qoraha lama yaqaan

**104. Naftaada ku kalsoonoow. Waxa aad taqaannaa wax ka badan waxa aad u malaynaysid in aad taqaannid.**

— Benjamin Spock

**105. Haddii aanad duuli karin, orod. Haddii aanad ordi karin, lugee. Haddii aanad lugayn karin, guurguuro. Balse si kasta oo aad samaysid, ha joojin horusocodka!**

— Martin Luther King, Jr.

**106. Ha joojin hawsha marka aad daashid, balse jooji hawsha marka aad dhammaysid!**

— Qoraha lama yaqaan

**107. Xusuusnow, maanta waa berridii aad ka werwersaneyd shalay.**

— Dale Carnegie

**108. Qofka aan geesinimo uu khataraha ku qaato lahayn, weligii nolosha wax naf leh ma soo hooyo.**

— Mohamed Ali

**109. Wanaagga aad maanta sameyso berri waa la illaawi doonaja. Si kasta oo ay ahaato wanaag samee.**

— Kent M. Keith

**110. Ka feker waxyaabaha quruxda badan ee hareerahaaga ku hadhay oo ku farax.**

— Anne Frank

**111. Wax kasta oo aad qabataa farqi ayay keenaan, markaa waa in aad doorataa nooca farqi ee aad rabtid in aad samaysid!**

— Jane Gooball

**112. Had iyo jeer waxa ay u muuqataa mid aan suuroobeyn ilaa la arko iyada oo la sameeyey.**

— Nelson Mandela

**113. Haddii aynu ku kalsoonnahay waxa aynu aaminsannahay, waa in aynaan ka cabsan xorriyadda fekerka.**

— Tayyip Erdogan

**114. U sheeg guddida tabnaanta ee madaxaaga ku shirsan in ay fadhiistaan oo ay aamusaan!**

— Kathy Kendall

**115. Gefafku waa albaabbada daah-furka!**

— James Joyce

**116. Ma tihid sabool haddii aad tahay bilaa lacag, waxa aad sabool tahay haddii aad tahay bilaa riyo.**

— Randy Gage

**117. Uma baqo qofka fekera xataa haddii uu lumo, waayo xaqa dib ayuu ugu soo noqon. Balse waxa aan u baqaa qofka aan fekerin xataa haddii uu dhabbada xaqa ku dhaco, waayo wuxuu ahaan doonaa sida bal dabayluhu wataan.**

— Sh. Mohamed Al-qasali

**118 .Haddii aanu mugdi jirin, weligeen meynaan aragneen xiddigaha.**

— Stephenie Meyer

**119. Ku hay indhahaaga xiddigaha, lugahaagana dhulka.**

— Theodore Roosevelt

**120. Yoolalkaaga meel sare ku laal, hana istaagin ilaa aad halkaas gaadho.**

— Bo Jackson

**121. Dhib ma leh sida aayarka ah ee aad u socoto haddiiba aanadistaagayn.**

— Confucius

**122. Khaladka keliya ee aan sameeyay waa in aanan garwaaqsan in aan qof sare ahay!**

— Muhammed Ali

**123. Qofka ka baqa in uu buuraha fuulo, cimrigiisa oo dhan wuxuu ku noolaadaa booraan.**

— Imaam Shaafici

**124. Ma noqon doontid waxa aad doonaysid in aad noqotid adiga oo kusii sugnaada waxa aad iminka tahay.**

— Zig Ziglar

**125. Qofna kuma dareensiin karo in aad tahay qof liita, adiga oo aan u oggolaan.**

— Eleanor Roosevelt

**126. Haddii aanad shay jeclayn, beddel. Haddii aanad beddeli karin, beddel sida aad u aragtidid iyo dhanka aad ka eegaysid.**

— Maya Angelou

**127. Qofna kuma siinayo madaxbannaani. Qofka kuma siinayo sinnaan iyo wax kale toona. Haddii raggannimo kugu jirto, adiga ayaa goosanaya.**

— Malcolm X

**128. Naftaada oo aad ahaataa waxa ay kaa dhigaysaa in aad dunidan kusoo kordhisay cid aan hore ugu noolayn.**

— Edwin Eliot

**129. Daqiiqad kastaa waa bilow cusub.**

— T.S. Eliot

**130. Maanta waa maalintaadii, buurtaadiina waa ay ku sugaysaa, ee tag oo qaad marinkaaga[1].**

— Dr Seuss

[1] wadadaadii

**131. Ha ka oggolaan waxyaabaha aanad samayn karin in ay kaa hor istaagaan qabashada waxyaabaha aad samayn kartid.**

— John Wooden

**132. Raynraynta ugu weyni waa samaynta waxa dadku ku dhahaan ma samayn kartid.**

— Walter Bagehot

**133. Macno ma laha inta uu qalbigaagu murugaysan yahay, haddii aanad joojin rumaynta riyada aad rabto in ay run noqoto.**

— Walt Disney

**134. Waa in aanad lumin kalsoonida dadnimada. Dadnimadu waa sida badweynta; haddii dhawr dhibcood oo ka mid ah badda ay wasakhaysan yihiin, badda oo dhani ma wada wasakhaysna.**

— Mohandas Karamchand Gandhi

**135. Dulqaad yeelo. Wax kastaa waa kakan yihiin inta ayna fudayd noqon.**

— Saadir

**136. Keli keli waxa aynnu qaban karnaa waxyar; wadajir waxa aynnu qaban karnaa wax aad u badan.**

— Helen Keller

**137. Dhammaan riyooyinkeennu waxa ay noqon karaan run haddii aynu ku dhiirranno in aynu raacdaysano.**

— Walt Disney

**138. Qaar badan oo guuldarreystay waa kuwa aan ogsooneyn sida ay ugu dhawaaayeen guusha markii ay faraha ka qaadeen.**

— Thomas Edison

**139. Haddii aad rabto in aad u iftiintid sida cadceedda, lahow kulaylkeeda oo kale.**

— Adolf Hitler

**140. Ninka keliya ee aan qalad sameeyn weligii waa ninka aan waxba sameyn.**

— Theodore Roosevelt

**141. Nina Kaman samaysno bir laakiin dadaalka ayaala la is dheeryahay.**

— Qoraaga buugga

**142. Mustaqbalku magacyo badan ayuu leeyahay. Kuwa daciifka ah waxa ay u yaqaannaan 'lama gaadhaan', kuwa cabsadaa waxa ay yidhaahdaan 'lama yaqaan', kuwa dhiirranna waxa uu u yahay 'xaqiiqda durugsan'.**

— Victor Hugo

**143. In aad dhimatid adigoo taagan ayaa ka fiican in aad noolaatid adigoo jilbahaaga dhulka ku haya.**

— Ernesto Che Guevara

**Marna ha sugin in ay kuu yimaadiin waxaad jeceshay, maxaa yeelay in aad soo xulato ayay u baahan yihiin, xitaa hadaad nasiib u yeelatay.**

— Qoraaga buugga

**144. Keliya kuwa ku dhiirrada in ay si xun u jabaan ayuun baa awooda in ay ku guuleystaan guulweyn.**

— Robert Francis Kennedy

**145. Dhiirranidu waa iska caabbinta cabsida, diidista in cabsidu ku dabarto, ee ma aha in aan la cabsan.**

— Mark Twain

**146. Wax kasta oo maskaxda qofku ka fekerto oo ay aaminto, waa ay sameyn kartaa.**

— Napoleon Hill

**147. Qofka keliya ee si dhab ah kuu dhiirrigelin karaa waa adiga.**

— Shaq

**148. Wax ka baro guuldaradaada. Haka cabsan in aad qalad sameyso. Khibraddu waa macallinka ugu wanaagsan, anigu waxaan wax ka bartay guuldarrooyinkayga.**

— Erik Spoelstra

**149, Had iyo jeer dareenkaagu ha ku hoggaamiyo. Marnaba ha weyddiin naftaada in ay macquul tahay iyo in kale.**

—Deepak Chopra

**150. Quruxda gabadhu ma aha dharka ay xidhan tahay, sida ay u eg tahay, ama sida ay timaheeda u shanleyso.**

— Audrey Hepburn

**151. Waxa aynnu u baahannahay in aynnu mustaqbalka fog eegno oo aynnu shiishka saarno meel sare oo fog.**

— Paul Biya

**152. Waxa aan ogaaday nolosha meel kasta oo aad rabto in aad ka gaadho in ay jirto waddo loo maro, haddii aad adigu si dhab ah u rabto in aad halkaas gaadho.**

— Langston Hughes

**153 Waa in aad si ribban diiradda u saartaa hadafyadaada si aad ugu guulaysatid hawlgalkaaga.**

— A.P.J. Abdul Kalam

**154. Miyaynaan garowsan in kalsoonida naftu ka timaaddo ku tiirsanaanta naftaada?**

— A. P. J. Abdul Kalam

**155, Dhanbaalka aan u dirayo dhallinyartu waa in ay yeeshaan dhiirranaan ay si ka geddisan ugu fekeraan, dhiirranaan ay wax ku ikhtiraacaan, ku soo gaalaabixiyaan goobaha aan la helin,**

—Qoraha lama yaqaan

**156. dhiirranaan ay ku daahfuraan ma-suurtgalayaasha, ku qabsadaan dhibaatooyinka iyo guusha. Kuwani waa astaamo heersare ah oo ay tahay in ay u shaqaystaan! Waa kaa dhanbaalkaygii dhallinyartu.**

— A.P.J. Abdul Kalam

**157. Dhammaanteen ma wada lihin hibooyin isle'eg, balse waxa aynu haysannaa fursado isle'eg oo aynu ku kobcin karno hibooyinkeenna!**

— A.P.J. Abdul Kalam

**158, Marka rejooyinkaagii iyo yoolashaadii digaandagaha noqdaan, badhaaga burburka fadhfadh; laga yaabaa in aad ka dhex heshid fursad dahabi ah e!**

— A.P.J. Abdul Kalam

**159. Waxa aad u muhiim ah in aynaan hilmaamin in waxa aynu nahay ka mudan yahay waxa aynu qabanno.**

— James HudsonTaylor

**160. Marar badan ayay dhib igu dhici; marar badan ayaan ka soo kaban. Layma jabin doono. Ma oggolaanayo in niyaddayda la jabiyo.**

— Banana Yoshimotoaato.

**161, Filashooyin sarreeyaa waa furaha wax walba.**

— Sam Walton

**162. Haddii aad si dhab ah wax u rabto, waxa aad heli doontaa habkii aad ku hanan lahayd. Haddii aanad si dhab ah u rabinna, waxa aad heli doontaa cudurdaar.**

— Jim Rohn

**163. Xataa haddii aanad lahayn wax kalsooni ah, waa in aad isu eekaysid sidii ruux leh.**

— Ashton Kutcher

**164. Waxa keliya ee aad mararka qaar gacanta ku haysaa waa aragtida. Adigu xaaladahaaga gacanta kuma haysid. Laakiin waxa aad dooran kartaa sida aad xaaladdaas u arkaysid.**

— Chris Pine

**165. Muhiimaddu ma aha xaaladda, laakiin waa sida aad uga falceliso xaaladda.**

— Zig Ziglar

**166. Bar iftiimaysa ayaa ku taal daruur kasta oo mugdi ah.**

— Bruce Beresford

**167. Waa in aynu nafaheenna ka xoraynaa rejada ah in baddu degi doonto. Waa in ayu barano sidii aynu badda ugu socdaali lahayn dabaysha oo kacsan.**

— Aristotle Onassis

**168. Ha sugin fursado aan caadi ahayn. Qaabee munaasabadaha caadiga ah oo ka dhig iyaga wax aad wanaag.**

— Orison Swett Marden

**169. Duruufta aad hadda ku jirto ma go'aamiso meesha aad tegi kartid; waxa keliya ay go'aamisaa meesha aad ka bilaabaysid.**

— Nido Qubein

**170. Marka aad guusha ugu baahato sida aad neefta ugu baahan tahay oo kale, markaas waa aad guuleysan doontaa.**

— Eric Thomas

**171, Jooji in aad si yar u hawlgashid. Waxa aad tahay koon guuraya e!**

— Jalaala'ddiin AlRumi

**172, Shalay waxa aan ahaa xariif waxa aanan isku deyayay in aan adduunka wax ka beddelo, maantase waxa aan ahay xakiim oo waxa aan beddelayaa naftayda!**

— Jalaala'ddiin AlRumi

**173, Kuma libi waa ay fududaan doontaa – waxa aan ku leeyahay waa ay u qalmi doontaa dhib kasta oo loo maro.**

— Arthur Williams

**174, Habeen kasta oo madow, waxaa ka danbeysa maalin ifaysa.**

— Tupac Shakur

**175. Ha sugin fursado aan caadi ahayn. Qaabee munaasabadaha caadiga ah oo ka dhig iyaga wax aad wanaag.**

— Orison Swett Marden

**176. Duruufta aad hadda ku jirto ma go'aamiso meesha aad tegi kartid; waxa keliya ay go'aamisaa meesha aad ka bilaabaysid.**

— Nido Qubein

**177,Marka aad guusha ugu baahato sida aad neefta ugu baahan tahay oo kale, markaas waa aad guuleysan doontaa.**

— Eric Thomas

**178 Jooji in aad si yar u hawlgashid. Waxa aad tahay koon guurayee. !**

— Jalaala'ddiin AlRumi

**179. Shalay waxa aan ahaa xariif waxa aanan isku deyayay in aan adduunka wax ka beddelo, maantase waxa aan ahay xakiim oo waxa aan beddelayaa naftayda!**

— Jalaala'ddiin AlRumi

**180. Kuma lihi waa ay fududaan doontaa – waxa aan ku leeyahay waa ay u qalmi doontaa dhib kasta oo loo maro.**

— Arthur Williams

**181, Habeen kasta oo madow, waxaa ka danbeysa maalin ifaysa.**

— Tupac Shakur

**182. Ha rejo-dhigin. Marka qorraxdu dhacdo, dayaxa ayaa soo baxa.**

— Qoraha lama yaqaan

**183 Haddii aad oroddo, laga yaaba in aad fashilanto. Haddiise aanad ordin, hubaal waa aad fashilmi!.**

— Jesse Jackson

**184. Madaxa sare u qaad, shafka taag. Mararka qaar waxa ay noqotaa mugdi, laakiin waagu wuu beryi.**

— Jesse Jackson

**185. Waa in aad wax hurtaa si aad wax wanaagsan u sameyso!**

— Zora Neale Hurston

**186, Ilaali ballan kasta oo aad qaaddo; keliya ballanqaad ballanta aad ilaalin karto.**

— Anthony Hitt

**187 . Qorshe wanaagsan oo hadda la qabto ayaa ka fiican qorshe dhammaystiran oo toddobaadka soo socda la qorsheysto.**

— George S. Clason

**188. Ma jiro wax aanad noqon karin, ama aanad samayn karin, ama aanad heli karin. Waxa aad tahay abuure heer sare ah.**

— Esther Hicks

**189. Tallaabada ugu horreysaa waa in ay gabi ahaanba kuu caddahay waxa aad rabto.**

— John Assaraf

**190. Ma jiro wax la yidhahdo gefaf ama guuldarrooyin; keliya waa casharo wax laga barto.**

— Denis Waitley

**191. Haddaba soco. Dhac. Adduunku wuxuu u eg yahay si kale marka aad hoos ka soo eegeysid.**

— Oprah Winfrey

**192. Marka wax dhacaan, way dhaceen. Dib ha u eegin. Horc uga soco hadafkaaga kan xiga.**

— George C. Marshall

**193. Walxuhu laga yaabaa in ay u yimaaddaan kuwa iska suga, balse waxa u yimmaada walxaha kuwa turunturrooday.**

— Abraham Lincoln

**194. Marka aan wax qorshaynayo, ma sii saadaaliyo guuldarada, sida ay doonto cimiladu ha ahaatee.**

— Jay Mullings

**195. Marna kama aad daahin in aad noqoto wixii aad noqon lahayd.**

— George Elliott

**196. Dhammaystirku ma aha wax la gaadhi karo, laakiin haddii aynu eryanno dhammaystir, waxa aynu gaadhi karnaa heer sare.**

— Vince Lombardi

**197. Waxaa laga yaabaa in aanad ogaan natiijada ka imanaysa ficilkaaga, laakiin haddii aanad waxba samayn, ma jiri doonto wax natiijo ahi.**

— Mahatma Gandhi

**198, Tanna, sidoo kale, waa laga baxayaa.**

— Napoleon Hill

**199. Sida ay doonaan ha u badnaadaan yoolalka aad gaadhay, waa in indhahaagu sare eegaan.**

— Jessica Savitch

**200. Bari iyo galbeed toona eegi meyno: hore uunbaynu eegaynaa.**

— Kwame Nkrumah

**201. Wax kasta in aanay suuragal ahayn ayay ula muuqdaan dadka aan weligood waxba isku deyin.**

—Jean-Louis Étienne

**202. Haddii aan lagu dhalleecayn, waxa ay u badan tahay in aanad hayn wax guul ah.**

— Malcolm X

**203. Waxa aad rabtaa in aad duusho... waa in aad iska dhigtaa wax yaabaha ku cuslaynaya.**

— Toni Morrison

**204. Bogsashadu waxa ay ka billaabmataa meesha dhaawacu ku gaadhay.**

— Alice Walker

**205 Ma noqon karno waxa aynnu rabno in aynnu noqonno innagoo iska joogna halkii hore.**

— Max De pree

**206. Sidee ayay noqon lahayd noloshu haddii aynaan haysan dhiirrani aynu wax (Waxa ay doonaan ha noqdaane) iskugu dayno?**

— Vincent Van Gogh

207. **Haddii aanad waxba halis gelin, markaas adiga ayaa halis geliyay wax walba.**

— Geena Davis

**208, Wax dhib ah kaa soo gaadhi maayo in aad mustaqbalka ka filato wanaag. Had iyo goor oohintaada dib baad u dhigan kartaa.**

— Lucimar Santos De Lima

**209. Cudurdaarradu waa musmaarrada loo isticmaalo in lagu dhiso aqalka guuldarrada.**

— Bill Rechin

210, **Reer galbeedku ma aha dad caqli badan, innaguna ma nihin doqommo. Keliya waxay dhiirrigeliyaan kooda fashilma ilaa iyo intuu ka guulaysanaayo, innaguna waxa aynu la dagaallannaa keena guulaystay ilaa iyo inta uu ka fashilmaayo.**

— Ahmed Zewail

**211, Haddii aad aragto waddo aan caqabado lahayn, waxa ay u badan tahay in aanay meelna kuu hoggaamineyn.**

— Frank A. Clark

**212. Sirta ka danbaysa in aad hore u socotaa waa tallaabada oo aad billawdo!**

— Agatha Christie

**213. Cidina ma burburin karto xadiidda (Iron), balse daxalaysigeedu waa burburin karaa. Sidaa oo kale, cidina ruuxa ma burburin karto, balse khayaaliga maskaxdiisa ayaa awooda in uu burburiyo!**

— Mufti Abdul Rahman

**214. Kan goor hore caawiyaa wuxuu caawiyey laba jeer.**

— Tadeusz Mazowiecki

**215. In aad ogaato waxa saxda ah oo aanad sameyn waa fuleynimada ugu weyn.**

— Confucius

**216. Ninka aan lahayn khiyaal-abuur, ma laha baalal.**

— Muhammad Ali

**217. Habka ugu fiican ee aad riyadaada ku rumayn kartaa waa in aad kacdo.**

— J. M. Power

**218. Guuldarradu waa qayb ka mida**

— Hank Aaron

**219.. Guushayda waxaa aan u sababeeyaa tan: Weligey maan cudurdaaran waxna uma cudur-daarin.**

— Florence Nightingale

**220. Kalsoonida iyo hawlkarnimadu waa dawooyinka u wanaagsan ee lagu dabiibi karo xannuunka loo yaqaan guul-darrada.**

— A.P.J. Abdul Kalam

**221. Marka aad guusha koowaad gaadhid ha isku nasan, sababta oo ah haddii aad gefto guusha labaad, dibno badan ayaa la soo diyaar ah in 'guushaadii hore nasiib ahayd'**

— A.P.J. Abdul Kalam

**222. Ha akhriyin sheekooyinka guusha ka sheekeeya; hal farriin uun baad helaysaaye. Akhrise sheekooyinka jabka ka sheekeeya; aragtiyo lagu guulaysto ayaad helaysaaye!**

— A.P.J. Abdul Kalam

**223. Si aad u noqotid horyaal weyn waa in aad aamintaa in aad tahay ka u wanaagsan – haddii aanad xataa ahayn, iska dhigdhig in aad tahay!**

— Mohamed Ali

**224. 'Guul-darro,'waa eray aan agtayda laga aqoonin!**

— Muhammad Ali Jinnah

**225. Guuldarradu waxa ay timmaaddaa keliya marka aynu hilmaamno ujeeddooyinkeenii iyo mabaa'di'deenii.**

— Jawaharlal Nehru

**226. Guushu waa wadarta dedaallada maalinlaha ah ee sida joogtada ah loo sameeyo.**

— Robert Collier

**227. Dadka qaar ayaa ku riyooda guusha halka kuwo kalena ay u kacaan oo ay shaqaystaan.**

— Qoraha lama yaqaan

**228. Guushu ma aha wax ka badan waxoogaa dhishbiliinyo fudud ah, oo maalin kasta lagu dhaqmo.**

— Jim Rohn

**229. Haddii aad ku laasho yoolkaaga meel aad u sarreysa oo aad guuldarraysato, waxa aad ku soo dhici doontaa meel ka sarreysa guusha dadka kale oo dhan.**

— James Cameron

**230. Guushu waa inta aad dib u soo booddo marka aad dhulka ku dhacdo.**

— George S. Patton

**231. Haddii aad ogtahay in aad guuldarreysan doontid, markaas u guuldarreyso si sharaf leh.**

— Cate Blanchett

**232. Marka aad guusha ugu baahato sida aad neefta ugu baahan tahay oo kale, markaas waa aad guuleysan doontaa.**

— Eric

**233. Ninka guul soo hoyn doonaa wuxuu ka fa'iideystaa qaladaadkiisi hore wuxuuna isku dayaa in uu waddo tii hore ka duwan qaado.**

— Dale Carnegie

**234. Guushu waxa ay kuu abuurtaa cadow badan. Waxa aan jeclaan lahaa in aanay sidaa ahaanin. Waxa ay noqon lahayd cajiib in aad ku raaxaysato guul adiga oo aan ka arkayn xaasidnimo indhaha dadka kugu hareeraysan.**

— Marilyn Monroe

**235. Joogiddaada iyo la'aantaadu Islaamka waa isugu mid, balse**
**adigu Islaamka la'aantii waad khasaaraysaa!**

— Ahmed Deedat

**236. Anshaxu waa biriishka u dhexeeya yoolka iyo guusha.**

— Jim Rohn

**Marnaba maad guuldarreysan ilaa aad joojisid iskudayga.**

— Mike Ditka

**237. Boqolkiiba sagaashan iyo sagaal guuldarrooyinku waxa ay ka yimaaddaan dadka leh caadada ah in wax walba cudurdaar loo sameeyo.**

— George Washington Carver

**238. Ninka la yimaadda fekrad cusub waa lala yaabaa ilaa iyo in'a fekerkiisu ka guuleysanayo.**

— Mark Twain

**239. U feker sidii nin-hawleed; una hawlgal sidii nin-fekereed!**

— Henri Louis Bergson

**240. Aynu maalinteenna hurno si ay carruurteennu u helaan berri ka wanaagsan!**

— AbuBakar Zaynal-Caabidiin

**241. Waa in aad yeelataa yool ujeeddo-fog si aad iskaga ilaalisid in aad ku jahawareerto guuldarrooyinka yaryar.**

— Charles C. Noble

**242. Waxa carruurtaada ka dhigi doona in ay guulaystaan ma aha waxa aad u qabatay iyaga, laakiin waa waxa aad bartay iyagu in ay qabsadaan.**

— Ann Landers

**243. Ma jiro wax la yidhaahdo guuldarro. Waa laba mid uun; in aad guuleysatay ama in aad waxbaratay.**

— Kevin Kruse

**244. U riyood si weyn kuna dhac guuldarrada.**

— Norman Vaugha

**245. Waxa aad u dhalatay in aad guuleysato, laakiin si aad guuleyste u noqoto, waa in aad qorsheysaa sidii aad u guuleysan lahayd, isu diyaarisaa sidii aad u guuleysan lahayd, waana in aad filataana in aad guuleysatid.**

— Zig Ziglar

**246. Ilaa labada dhinac guuleystaan, ma jirayo heshiis waarayaa.**

— Jimmy Carter

**247. Siddeetan boqolkiiba guushu waa isa-soo-xaadirin.**

— Woody Allen

**248. Haddii aan dib ugu noqonno 1800, qof walba wuxuu ahaa sabool. Waxa aan ula jeedaa qof walba. Kacaankii Warshadaha ayaa bilowday, kadib waddamo badan ayaa ka fa'iideystay, laakiin si kasta oo ay tahay cid walbaa ma ay gaadhin fa'iidadu.**

— Bill Gates

**249. Guushu waxa ay leedahay qaacido fudud: samee sida ugu fiican, laga yaabaa in dadku ka helaan.**

— Sam Ewing

**250. Mararka qaar dhibaatadu waa waxa aad u baahan tahay in aad wajahdo si aad u noqoto qof guuleysta.**

— Zig Ziglar

**251. Ma aha doonista guushu waxa kaa dhigaya in aad guuleysatid; waa diidista in aad guuldareysatid.**

— Qoraha la ma yaqaan.

**252. Ragga iyo dumarka guuleystay waa kuwa socodka aan joojin. Qalad waa ay sameeyaan, laakiin ma joojiyaan socodka.**

— Conrad Hilton

**253. Si aad u guuleysato, rabitaankaaga guushu waa in uu ka weynaadaa cabsidaada guuldarada.**

— Bill Cosby.

**254. Haddii aan baabbi'inno xuquuqda aadanaha iyo dhawrista sharciga si wax looga qabto argagixisada, waa ay innaga guuleysatay argagixisadu.**

— Joichi Ito

**255. Hanashada wax weyn badanaa waxa ay ka dhalataa huridda wax weyn, weligeedna may noqon natiijada danaysinnimada ka dhalata.**

— Napoleon Hill

**256. Sida loo guuleystaa ma aha wax sir ah. Waa natiijada isdiyaarinta, shaqo adag, iyo in wax laga barto guuldaradii hore.**

— Colin Powell

**257. Ma jiro nin guulaystay oo aanay ka danbeyn naag wanaagsani. Xaas ama hooyo, haddii uu labadaba isku haysto, labo jeer buu barakeysan yahay.**

— Godfrey Winn

**258. Haddii aad ku guuldarraysato in aad qorshe sameysato, waxa aad qorshaysatey guuldarro.**

— Qoraha la ma yaqaan

**259. Guushu aad bay u fududdahay. Samee waxa saxa ah, u samee sida saxa ah, waqtiga saxda ah.**

— Arnold H. Glasow.

**260. Wax kasta oo u qalma in la sameeyo waxa ay u qalmaan in si aayar ah loo sameeyo.**

— Mae West

**261. Waa ay adag tahay in laga guuleysto oo laga adkaado qof aan weligiis isdhiibeyn.**

— Babe Ruth

**262. Habka ugu gaaban ee wax badan loo sameeyo waa in aad hal wax samayso markiiba.**

— Sydney Smiles

**263. Haddii aynu u tababbaranno si xun, waxaynu u ciyaarnaa si xun, sababtuna waa sida xun ee aynu u tababbarannay. Farqiga u dhexeeya in aad guulaysato iyo in aad guuldarraysato waa in aad wax saxdo ama aad wax khaladdo.**

— Shiv Khera

**264. Marnaba ma beddeli doontid noloshaada ilaa aad beddesho waxyaabaha aad maalin walba samaysid. Sirta guushaadu waa in aad hesho waxyaabaha aad maalin walba u qabato si joogto ah.**

— Qoraha la ma yaqaan

**265. Waxa aan idin dhahayaa nasiibku waa marka ay fursad kuu timmaaddo iyadoo socota adna aad u sii diyaargarowday.**

— Denzel Washington

**266. La shaqaynta dadka waaweyn waxa ay kaa dhigeysaa qof weyn; waxaad baran wax badan, sidoo kale waxa aad ka helaysa qibrad iyo kalsooni aad hore ugu sii waddo xirfaddaada.**

— Nas

**267. Haddii aad guuleysato, waxaad abaalmarin u heli doonta asxaab beena iyo cadow run ah. Si kasta oo ay ahaato guuleyso.**

— Kent M. Keith

**268. Yoolalka iyo ujeeddooyinkuba waxa ay ku saleysan yihiin aragtiyo iyo aasaas.**

— Abdolkarim Soroush

**269. Diyaaraddu badanka waxa ay ammaan ku tahay in ay garoonka iska fadhido, balse looma samaynin in ay sidaa ahaato. Mararka qaar waa in aad gashaa haliso micno samaynaya si aad u gaadhid heer sarreeya!**

— Chandra Sekhar Azad

**270. Anigu ma aaminsani qaadashada go'aanka saxsan, waxa aan qaataa go'aanka ka dibna waxa aan ka dhigaa mid saxan!**

— Muhammad Ali Jinnah

**271. Sirta isbeddelku waa in aad diiradda saartid tamartaada oo idil, tamartaasna aanad u isticmaalin burburinta wixii duugga ahaa balse aad u adeegsatid dhisidda wax cusub!**

— Socrates

**272. Qofka guulaystaa waa kan leh himilo kaas oo aan weligii niyad jabin.**

— Nelson Mandela

**273. Weynaanta uu qaran leeyahay waxaa lagu cabbiraa sida ay ula dhaqmaan kuwooda jilicsan.**

— Mahatma Gandhi

**274. Gabadha guulaysatay waa tan ka dhisi karta sees adag jaajuurrada ay ku soo tuurtuuraan dadka kale!**

— Pablo Neruda

**275. Dariiqa keliya ee aad hawl weyn ku qaban kartaa waa in aad jeclaato waxa aad qabanayso.**

— Steve Jobs

**276. Weli waxaan cagahayga ku hayaa dhulka, keliya waxaan xiranahay kabo ka fiican kuwii hore.**

— Oprah Winfrey

**277. Xorriyaddu waligeed laysma siiyo; waa lagu guuleystaa.**

— A. Philip Randolph

**278. Anigu waa aan aqbali karaa guuldarrada; laakiin ma aqbali karo in aan laysku dayin.**

— Michael Jordan

**279. Raggu waa waxa ay hooyooyinkood ka dhigaan.**

— Ralph Waldo Emerson.

**280. Erdogan ayaa mar sheegay in ay dimuqraadiyaddu tahay sida bas oo kale. 'Marka aan gaadho halkii aan u socday, ayaan ka degayaa.'**

— King Abdullah II of Jordan

**281. Falcelinta aad ka bixisid guul-darradu waxa ay go'aamisaa dhererka guushaada.**

— Robin Sharma

**282. Ma jiro nin leh xasuus fiican oo ku filan si uu beentiisa ugu guuleysto.**

— Abraham Lincoln

**283. Guushu waxa ay ku xidhantahay is-diyaarin hore, is-diyaarin la'aan waa la hubaa in aad guul-dareysan doonto.**

— Confucius

**284. Farqiga u dhexeeya qofka guuleystay iyo kuwa aan guuleysan ma aha awood la'aan, ma aha aqoon la'aan, laakiin waa doorbidid doonis la'aan.**

— Vince Lombardi

**285. Ujeeddadaadu yaanay ahaan guul haddii aad rabtid; keliya samee waxa aad jeceshahay oo aamin, kadib iyadaa guushu si caadiya iskaga imaan doonta.**

— David Frost

**286. Hawlaha la qabto waxa ugu roon fulinta waxa uu Eebbe ku faray, ka dheeraanshiyaha waxa uu Eebbe kaa reebay iyo ku kalsoonaanta waxa Eebbe agtiisa ahaaday!**

— Omer Bin Khaddaab

**287. Had iyo jeer samee sida ugu fiican. Waxa aad hadda beerato, waxa aad goosan mar danbe.**

— Og Mandino

**289. Guul-darradu waa keliyaata fursad labaad si aad mar labaad u bilawdid, balse markan xariifnimo dheeraad ah ayaa lagaa rabaa.**

— Henry Ford

**290. Guushu waa naftaada oo aad jeclaatid, waxa aad samaynaysid oo aad jeclaatid iyo habka aad u samaynaysid oo aad jeclaatid.**

— Maya Angelou

**291. Guushu ma aha inta lacag ah ee aad samaysid, guushu waa inta farqi ee aad dadka noloshooda ku samaysid.**

— Michelle Obama

**292. Si aynu u guulaysanno, ugu horrayn waa in aynu aamminnaa in aynu guulaysan karno.**

— Nikos Kazantzakis

**293. Weligay kuma aan riyoon guusha, waan u shaqaystay.**

— Estee Lauder.

**294. In aad sii ahaato qofka aad tahay adduunkan sida joogtada ah iskugu dayaya in uu kaa dhigo wax kale waa guusha ugu weyn.**

— Ralph Waldo Emerson

**295. Marka ay caddahay in aanad yoolkaagii gaadhi karaynin, ha beddelin yoolka ee beddel dhabbada aad u maraysid.**

— Confucius

**296. Guushu kuu imaan meyso, waa in aad adigu u tagtaa.**

— Marva Collins

**297. Waxaannu nahay duul uu Eebbe ku sharfay diinta Islaamka, haddii aannu ka raadinno sharafta meel kalana, Eebbe wuu ina sharaf-tiri.**

— Omer Bin Khaddaab

**298. Fashilaaddu ima loodin karto weligay mar haddii bar dhammaadka guushaydu aad u xooggan yahay.**

— Og Mandino

**299. Maan guuldarreysan. Kaliya Waxaan helay 10,000 oo waddo oo aan shaqayneyn.**

— Thomas Alva Edison

**300. Hal fure oo muhiim u ah guushu waa kalsoonida. Hal fure oo muhiim u ah kalsooniduna waa diyaargarowga.**

— Arthur Ashe

**301. Dadka ka cabsada in ay guuldarreystaan marnaba ma dhadhamin doonaan farxadda guusha.**

— Pete Zafra

**302. Waxaan soo guuldarreystay marar badan —taasina waa sababta aan u guuleystay.**

— Michael Jordan

**303. Weligaa ha soo hadal qaadin 'Guuldarro'. Adeegso erayada ay ka mid yihiin rejo, rumayn, iimaan, guul.**

— Norman Vincent Peale

**304. Waxa ugu weyn ee hortaagan guusha waa cabsida guuldarrada.**

— Sven Goran Eriksson

**305. Ma aqaan furaha guusha, laakiin furaha guuldarradu waa iskudayga in qof walba la raalligeliyo.**

— Bill Cosby

**306. Dabeecadda jacaylka ayaa ah in jacayl dartiis aad qof u disho, ama adigu u dhimato.**

— Maaza Mengiste

**307. Haddii qalbigu adkaado, indhuhuna way engegaan!**

— Ibn Al-Qayyim

**308. Qofka ku jeceli denbi in aad ku dhacdo ayuu kaa ilaaliyaa!**

— Ali bin abi-Dalib

**309. In la igu naco waxa aan ahay ayaan ka doorbidayaa in laygu jeclaado wax aanan ahayn.**

— Kurt Cobain

**310. In qof si qoto dheer kuu jeclaado waxa ay ku siinaysaa xoog, halka in aad qof si qoto dheer u jeclaataana ay kuu siinayso dhiirrani.**

— Lao Tzu

**312. Wax walba oo aad rabtid in aad samayso, haddii aad rabto in aad ku wanaagsanaato, waa in aad jeclaataa waxa**

**aad samaynaysid oo aad awooddaa in aad wax badan u hurto.**

— Maya Angelou

**313. Ha ka quusan dadka aad jeceshahay. Dulqaadkaaga iyo daacadnimadaada ayaa laga yaabaa in ay kuu soo celiso.**

— Joyce Meyer

**314. Waxaa ka wanaagsan in lagugu naco waxa aad tahay intii lagugu jeclaan lahaa wax aanad ahayn.**

— André Gide

**315. Waxa ugu fiican uguna quruxda badan adduunka lama arki karo lamana taaban karo – waxa laga dareemaa qalbiga.**

— Helen Keller

**316. Uma baahnid in aad dadka isu-eekaysid. Naftaada jeclow.**

— Lea Michele

317. **Anigu ma garanayo in jacaylku isbeddelo. Dadku waa isbeddelaan. Xaaladuhu waa isbeddelaan.**

— Nicholas Sparks

**318. Adiga, qudhaada, sida uu qof walba oo adduunkan joogaa ugu qalmo kalgacaylkaaga ayaad adiguna ugu qalantaa.**

— Buddha

319. **Gabadhu ninka ay jeceshahay wejigiisa waxa ay u taqaannaa sida badmaaxu u yaqaan badda furan.**

— Honore de Balzac

**320. Jacaylka iyo naxariistu waa daruuriyaad, nolosha heerka sare ahima aha wax daruuri ah. Jacayl iyo naxariis la'aan adduunku muu jireen.**

— Dalai Lama

**321. Jacaylku waa nolosha. Haddii aad jacayl waydo, noloshana waad weyday.**

— Leo Buscaglia

**322. Mar kasta oo aynu kulanno aynu isu dhoolla-caddeyno, dhoolla caddeyntu waa billawga jacaylka.**

— Teresa

**323. Sida keliya ee wax weyn lagu samayn karaa waa in aad jeclaato waxa aad qabanayso.**

— Steve Jobs

**324. Hooyooyinku waxa ay gacan qabtaan carruurtooda waqti yar, laakiin qalbigooda weligood kama baxaan.**

— Qoraha lama yaqaan

**325. Ma jiro wax keeni kara guriga ammaan dhab ah oo aan ka ahayn jacayl dhab ah.**

— Billy Graham

**326. Quruxda keli ah ee waartaa waa quruxda qalbiga!**

— Jalaala'ddiin AlRumi

**327. I nac ama i jecloow, aniga agtayda labadaba waa laga jecel yahay.Haddii aad i jeclaatidna, mar kasta qalbigaaga ayaan ku sugnaan, haddii aad i nacdana, mar kasta waxa aan ku sugnaan caqligaaga!**

— William Shakespeare

**328. Haddii uu nin ku rabo, wax kaa joojin kara ma leh. Haddii aanu ku rabinna, wax kuu joojin kara ma leh.**

— Oprah Winfrey

**329. Waxa ugu muhiimsan ee Aabbe awoodo in uu u qabto ubadkiisu waa in uu jeclaado Hooyadood.**

— Theodore Hesbergh

**330. Qofka dhaha wax uu jecel yahay, wuxuu maqlaa wax aanu jeclayn.**

— Leonard Louis Levinson

**331. Dumarku waxa ay jecel yihiin in la daneeyo oo weliba si cad loogu sheego in la jecel yahay. Ha ka gaabsan u sheegashada jacaylkaaga xaaskaaga. Haddii aad ka gaabisid sheegashada jacaylkaaga, waxa aad dhisaysaa teed qalafsanaan ah oo adiga iyo oorida idin kala dhex dhigma, xiisihiina gabaabsi ayuu noqon.**

— Imam Ahmed ibn Xanbal

**332. Waan ku jeclahay, ma aha keliya waxa aad tahay in aan kugu jeclahay, laakiin waxa aan noqdo anigu marka aan kula joogo.**

— Roy Crof

**333. Jacaylku waa ciyaar laba qof ciyaari karaan isla markaasna ay labadooduba guuleysan karaan.**

— Eva Gabor

**334. Halka aynu jeceInahay waa guriga – guriga laga yaabo in cagaheennu ay ka tagaan, laakiin aanu wadnaheennu ka tegin.**

— Oliver Wendell

**335. Waxa aan jeclahay riyada mustaqbalka iyadaa ka wanaagsan taariikhda la soo dhaafay.**

— Thomas Jefferson

**336. Dab fiican ayaa laga yaabaa in uu wadnahaya ka daaran yahay, haddana lama hayo ruux u soo diirrimaad doonta. Socotaduna qiiqa ayuun bay arkaan!**

— Vincent Van Gogh

**337. Meelaha qaar; waa in aad xaqiiqsatid in ay jiraan dad wadnahaaga degi kara balse aan noloshaada oo idil degi karin!**

— Qoraha lama yaqaan

**338. Marka aad qof la faraxsan tahay, adiga kuma khuseeyaan dadka la'aantaa aan faraxsanayni!**

— Shashank Rayal

**339. Bal luuqadaha oo dhan isugu gee afka ruux wax jecel, hal**
**dhaqdhaqaaq oo wadnihiisu sameeyo ayaa gebigoodaba ka adag kana dhigaya sidii aamusane-hadlaya!**

—Maxmuud Saaddiq Ar-raafici

**340. Jacaylka badan waan ka baqaa; haddana jacaylka yari ima raalligeliyo!**

— Mai Ziadah

**341. Si ay afadu u noqoto xaas faraxsan, waa in ay ninkeeda in yar jeclaataa in badanna fahantaa. Si ninkuna u noqdo say faraxsan, waa in xaaskiisa in badan jeclaadaa, balse aanu isku deyinba in uu fahmo!**

— Anis Mansour

**342. Waajibku wuxuu inaga dhigaa in aan wax si wanaagsan u sameyno, laakiin jacaylku wuxuu inaga dhigaa in aan wax si qurux badan u sameyno.**

— Zig Ziglar

**343. Carruurtu waxa ay u baahantahay jacayl, gaar ahaan marka aanay muteysan.**

— Qoraha la ma yaqaan

**344. Maalintooda ugu xun kuwa qabta waxa ay jecel yihiin ayaa ka wanaagsan maalintooda ugu fiican kuwa qabta wax aanay jeclayn.**

— Jim Rohn

**345. Jacaylku waa marka qofka kale farxaddiisu kaala muhiimsan tahay farxaddaada.**

— H. Jackson Brown, Jr.

**346. Mugdi kaama saari karo mugdi: iftiinka oo keliya ayaa mugdi kaa saari kara. Nacayb kaama saari karo nacayb: jacayl oo keliya ayaa kaa saari kara nacaybka.**

— Martin Luther King, Jr.

**347. Afadu waa in ay ninkeeda ka sameysataa in uu ku farxo in uu yimaaddo guriga, ninkuna waa in uu ka sameystaa in ay ka xumaato marka ay afadu aragto ninkeeda oo guriga ka baxaya.**

— Martin Luther King, Jr.

**348. Waxaa oolli karta qoonsimaad qoto dheer meeshii aanu jacayl qoto dheer oollin.**

— Martin Luther King, Jr.

**349. Jacaylku waa ciidanka keliya ee awooda cadow in uu u beddelo saaxiib.**

— Martin Luther King, Jr.

**350. Hooyaday mar walba waxa ay ii sheegi jirtay: 'Haddii aanad heli karin wax aad u noolaato, waa in aad hesho wax aad u dhiman karto.'**

— Tupac Shakur

**351. Waajibka ugu horreeya ee jacaylku waa in la isdhegeysto.**

— Paul Tillich

352. **Adigu ma dooratid qoyskaaga. Waa maquuno uu Eebbe ku siiyay, si la mid ah sida aad adba iyaga ugu tahay!**

— Desmond Tutu

**353. Waddaniyaddu waa taageeridda dalkaaga mar kasta, iyo dawladdu marka ay u qalanto.**

— Mark Twain

354. **Qoysku ma aha wax muhiim ah. Waa wax walba.**

— Michael J. Fox

**355. Ubax ma bixi karo qorrax la'aan, ninkuna ma noolaan karo jacayl la'aan.**

— Max Muller.

**356. Mararka qaarkood qalbigu wuxuu arkaa wax ka qarsoon indhaha.**

— H. Jackson Brown, Jr.

**357. Waxaan iftiinka ku jeclaan doonaa inuu jidka i tuso, laakiin weli waxaan ku adkaysanayaa gudcurka, maxaa yeelay, waxaa uu i tusayaa xiddigaha.**

— Og Mandino

**358. Samee jacayl ee ha samayn dagaal!**

**— Chris T. Atkinson**

**359. Dagaalku ma dili karo jacayl. Jacaylkuna ma dili karo dagaal!**

**— Helene Lagerberg**

**360. Indhaha ku jeceli waxa ay kaa arkeen bay beeniyaan. Dhegaha ku necebina wax lagaa sheegay ayay aaminaan.**

— Najiib Mahfuuz

**361. Haddii aad sababo u haysid jacaylka aad ruux kale u haysid, waxba ma jeclid!**

— Slavoj Zizek

**362. Cidna ma ay qiyaasin, xataa maansayahanku, xaddiga uu qalbigu qaado!**

— Zelda Fitzgerald.

**363. Jacaylku ma laha sees. Waa badweyn aan bilaw iyo dhammaad toona lahayn.**

— Jalaala'diin al Rumi

**364. Ma adiga ayaa qurux badan oo sidaa darteed baan kuu jeclaaday? Mise anigaa ku jecel oo sidaa darteed baad u qurux badnaatay?**

— Qoraha lama yaqaan

**365. Hooyadu waa shiidaalka ugu wanaagsan ee qof caadi ah ka dhiga in uu samayn karo wax aan suurogal ahayn.**

— Marton C. Garretty

**366. Hooyadu waa qofka kaalinta cid kasta buuxin karta balse aanay cidina kaalinteeda buuxin karin.**

— Qoraha lama yaqaan

**367. Wax kasta oo aan ahay ama aan rejaynayo in aan noqdo waxa iska leh Hooyaday!**

— Abraham Lincoln

**368. Hooyaday waa mucjiso lugaynaysa!**

— Leonardo Dicaprio

**369. Xaqa ugu weyn ee ay haweenay heshaa waa in ay Hooyo noqoto!**

— Lin Yutang.

**370. Hooyadu ma aha ruux lagu tiirsado, ee waa ruux ku tiirsanaantaba meesha ka saarta kana dhigta mid aan daruuri ahayn.**

— Dorothy C. Fisher

**371. Hooyooyinku waa kuwa iska keen jeclaada sabab fiican la'aan.**

— Maggie Gallagher

**372. Waxaan garwaaqsaday marka aad eegto hooyadaa, waxa aad arkeysaa jacaylkii ugu saafisanaa ee waligeed la ogaado.**

— Mitch Albom

**373. Dunida ma jiro fan la mid ah heesta hooyadu ubadkeeda ugu heesto.**

— Billy Sunday

**374. Ma jiro goor iyo goob u gaar ah jacaylka. Waxa uu u dhacaa si shil ah, in uu wadne ku garaacmo, in hillaac (biriq) ku dhaco, muddo aad u xanuun badan ayuu ku dhacaa.**

— Sarah Dessen

**375. Qalbigaba waxa loo sameeyay in uu burburo!**

— Oscar Wilde

**376. Guurka aan caadiga ahayni ma aha mid bilaa khilaafyo ah. Waa mid daacadnimada, istirxgelinta iyo iscafintu yihiin seeska!**

— Qoraha lama yaqaan.

**377. Waa jacaylka waxa kaa dhigaya in aad qofka kale la doontid in uu faraxsanaado, xataa haddii aanad adigu qayb ka ahayn farxaddiisa.**

— Julia Roberts

**378. Haddii aad aragtid ninkaaga oo kugu sheegaya wanaagga aad leedahay, ha ka fili waayin in uu kugu sheego xumaanta aad leedahayna!**

— Wahab Bin Manbah

**379. Dadka aad jeceshahay sii baalal ay ku duulaan, xididdo ay ku soo noqdaan iyo sababo ay ku joogaan.**

— Dalai Lama

**379. Jacaylku waa sida cinjirka (laastiiggaa) oo ay laba gacmood kala jiideen, haddii midkood sii dayso, tan kale ayuu xanuujiyaa.**

— Qoraha la ma yaqaan.

**380. Jacaylka ugu wanaagsani waa kan kaa dhiga ruux ka wanaagsan sidii hore, isaga oo aan beddelayn cidda aad tahay kaana dhigayn cid aan adiga ahayn.**

— Maya Angelou

**381. Waxa aan kuusoo jeedinayaa in aad dagaalka geshid balse kuuma soo jeedinayo in aad jacayl geshid. Waayo dagaalka ama waad noolaan ama waad dhiman, balse jacaylka mana noolaanaysid mana dhimanaysid.**

— Adolf Hitler

**382. Waxaad tiraahdaa roobkaan jeclahay, haddana dallad baad ku hoos martaa. Waxaad tiraahdaa cadceeddaan jeclahay, haddana waad ka harsataa. Waxaad tiraahdaa dabayshaan jeclahay, haddana daaqadahaad ka xirataa. Sidaa darteed baan uga cabsadaa marka aad i tiraahdid adiga ayaan ku jeclahay!**

— Bob Marley

**383. Hooyaday waxa ay ahayd haweeneydii ugu quruxda badneyd ee aan abid arko. Wax walba oo aan ahay iyadaa igu hagtay. Waxaan u nisbeynaya guusha nolosheyda oo dhan anshaxa guud, caqliyan iyo aqoonta muuqataba in aan iyada ka keenay.**

— George Washington

384. **Jeclaaw dhammaantood, ku kalsoonoow inyar, ha xumeyn cidna.**

— William Shakespeare

**385 Marna haka xirin dibnahaaga kuwa aad mar horeba u furtay qalbigaaga.**

— Charles Dickens

**386. Jacaylka ku fidi meel kasta oo aad tegtid. Cid kasta oo kuu timaadda ha u oggolaan in ay kaa tagto iyada oo aan sidii hore ka faraxsanayn.**

— Teresa

**387. Jacaylka keliya ee aan rumeysanahay waa kan hooyadu u hayso ubadkeeda.**

— Karl Lagerfeld.

**388. Waqtigu wuxuu noqon karaa cadowgaaga ama saaxiibkaa.**

— Ray Charles

**389. Waxa aan waqti badan dersaa dadka. Sababo awgeed, innagu kuma fiicnin in aynu aragno waxa ina hor yaalla ama in aynu dhegeysanno waxa aynu maqlayno.**

— Ben Okri.

**390. Kuwa waqtigooda sida ugu xun u isticmaalaa waa kuwa ugu horreeya ee ka cawda gaabnida waqtiga.**

— Jean de La Bruyère

**391. Waxaa jira waqtiyo ay aamusnaantu tahay dhawaaqa ugu codka dheer.**

— Leroy Brownlow

**392. Waqtiga oo aad lumiso ayaa ka daran dhimashada. Waayo dhimashadu waxa ay kaa fogaysaa dunida uun, balse waqti lumintu waxa ay kaa fogaysaa Eebbe!**

— Ibn Al-Qayyim

**393. Maquunada u weyn ee aad ruux siisaa waa waqti. Waayo waxa aad qofka siisay wax aanad ka soo ceshan karin!**

— Qoraha lama yaqaan.

**394. Hannaanka aynu waqtigeenna u kharash-gareynaa waxa uu ka turjumayaa cidda aynu nahay!**

— Jonathon Estrin

**395. Waqti intaa ka badan ha ku lumin in aad falanqaysid kana dooddid waxa ay tahay in uu noqdo qofka wanaagsani. Noqo adigu qof wanaagsan!**

— Marcus Aurelius.

**396. Waqtigaagu waa xaddidan yahay ee ha ku lumin noolaanshiyaha nolosha qof kale!**

— Steve Jobs

**397. Waqtigu waxba ma daweeyo… waxa uu ina baraa uun sidii aynu u noolaan lahayn innaga xanuunkii dareemayna!**

— Qoraha lama yaqaan

**398. Dadka qaar ayaa gabow ku dareema 18 jirka, qaarkoodna dhallinyarnimo ayay ku dareemaan 90 jirka … waqtigu waa fahan uu aadanuhu abuurto!**

— Yoko Ono

**399. Badankeennu waxa aynu waqti badan ku luminnaa wax degdeg ah; haddana waqti ma siinno waxa muhiimka ah!**

— Stephen Covey

**400. Waxa aynu ku tirawnaa in aynu luminnay waqti. Maan-gal ma aha. Waxa aynu luminnay nafaheenna.**

— Alice Block

**401. Waqtigu waxa uu leeyahay qaab u gaar ah isla markaana cajiib ah oo uu inoo tusiyo waxa muhiimka ahi waxa uu yahay!**

— Qoraha lama yaqaan

**402. Waxa ay tahay in aynu qabannaa waa go'aan ka gaadhista waxa aynu ku samayn lahayn waqtiga la inoo gartay.**

— Gandalf

**403. Waqtigu waa ka qaalisan yahay lacagta. Lacag badan waad kasban kartaa, balse waqti badan ma kasban kartid!**

— Jim Rohn

**404. Waqtiga aad lumintiisa ku raaxaysanaysaa, ma uusan lumin!**

— John Lennon

**404. Nacaybka dadka waxaa kaaga lumaya waqti badan uun.**

— Marian Anderson

**405. Waqti la hadlo iyo waqti la aamuso ayaa kala jira.**

— Aung San Suu Kyi

**406. Nolosha iyo waqtigu waa labada bare ee dunida ugu wanaagsan:**

**407. Noloshu waxa ay ina bartaa adeegga wanaagsan ee waqtiga, waqtiguna waxa uu ina baraa qiimaha ay noloshu leedahay!**

— A.P.J. Abdul Kalam

**408. Waxa jirta tuug aan cidina ciqaabin; waa kuwa kaa xada waqtigaaga!**

— Napoleon Bonaparte

**409. Ha isku marin dhabbo aanad garanayn meesha ay ku dhammaanayso!**

— Qoraha lama yaqaan

**410. Waqtigu innama beddelo ee daboolka uun buu innaga qaadaa.**

— Max Frisch

**411. Marnaba ha ka tanaasulin mabda'yadaada, xitaa haddii ay kugu hoggaaminayaan waqtiga dhow xaalad adag.**

— Alan Casden

**412. Haddii aad maqnayd xilligii aan halgamayay, ha filan in aad timaaddid xilliga aan dabbaaldegayo.**

— Will Smith

**413. Uma hayo waqti aan kaga werwero cidda aan i jeclayn... Waxa aan ku mashquulsanahay jacaylka kuwa i jecel.**

— Qoraha lama yaqaan

**414. Waa inta aad ku jirto waqtiga ugu xun noloshaada marka aad ogaan kartid midabka dhabta ah ee dadka ku yidhahda, 'Waan ku daaneynaynaa.'**

— Ritu Ghatourey

**415. Tagtada wax ka baro, u diyaargarow mustaqbalka, waqtiga la joogana wax qabso.**

— Mike Van Hoozer

**416. Maalmihii ay cadowgeennu innoogu hanjabi jireen bambooyinka nukliyeerku waa ay dhammaadeen.**

— Kim Jong-un

**417. Waxaa immaanaya waqti ay khiyaamo tahay aamusnaantu.**

— Martin Luther King, Jr.

**418. Raggu waxa uu seexdaa 6 saacadood, dumarkuna 7 saacadood. Balse qofka doqonka ah ee weliba garashadana saboolka ka ahi waxa uu seexdaa 8 sacadood iyo wax ka badan.**

—Napoleon Bonaparte

**419. Waqtiga ha iskaga lumin garaacista gidaar, adiga oo ka filaya in uu isu beddelo albaab.**

— Coco Chanel

**420. Aqoon bilaa fal ahi waa waalli; fal bilaa aqoon ahina waa faan.**

— Imam Ghazali

**421. Ilaa aad naftaada qiimaysid, ma qiimayn doontid waqtigaaga. Ilaa aad waqtigaaga qiimeysidna, waxba kuma samayn doontid.**

— M. Scott Peck

**422. Waa maxay waxa aad ka fekerto waqtigaaga inta u badan?**

— Danny Pettry

**423. Sameynta sida ugu fiican xilligan ku dhigaysa meel ka fiican xilligan ka xiga.**

— Oprah Winfrey

**424. Marka aad qof cafinayso, waxba kama beddeli doontid tagtada laakiin hubaal waxa aad wax ka beddelaysaa mustaqbalka.**

— Bernard Meltzer

**425. Had iyo jeer waxa ay dhahaan waqtiga ayaa wax beddela, laakiin dhab ahaantii adiga ayaa ay tahay in aad beddesho.**

— Andy Warhol

**426. Haddii aanad hoggaanka u qaban waqtigaaga, waxa aad u suurtagal ah in aad addoon u noqonaysid dadka iyagu hore hoggaanka ugu qabtay waqtigooda!**

— Brandon A. Trean

**427. Waqtigu waa hantida keliyaata ee aadane oo dhami haysto, haddana waa waxa keliyaata ee aanay ka baaqsanayn in ay lumiyaan!**

— Thomas Edison

**428. Ka adkoow waqtigaaga; waxa aad ka adkaan noloshaada e!**

— Qoraha lama yaqaan

**429. Adiga oo aan ugu horraynta yoolalkaaga si cad u qeexi karin, waa wax aan suurtagal ahayn in aad qorshe diiradda saartid si aad u fulisid. Tani waa sababta dejisashada hadafyadu ugu yihiim caws jiilaal maaraynta waqtiga.**

— Mani S Sivasubramaniam

**430. Habka ugu fiican ee loogu noolaan karo nolol micno lihi waa dejisashada qorshaha hal maalin subaxii, hadhow habeenkiina dib-u-eegista natiijada ka soo baxda!**

— Alexis Carrel

**431. Dadku saacadaha maalinta waxa ay u kala adeegsadaan si kala geddisan. Balse sida aad waqtigaaga u adeegsataa waxa ay turjumaysaa tayadaada!**

— Qoraha lama yaqaan

**432. Marka aynu wax dib u dhigayno, noloshu xawaare ayay jaraysaa!**

— Seneca

**433. Ninna lacag dheeraad ah ma dalbado marka uu naxashka saaran yahay!**

— Rick

434. **Haddii aynaan waqtiga maarayn karin, wax kale ma maarayn karno!**

— Peter Drucker

**435. Caqabaddu ma aha maaraynta waqtiga, balse waa maaraynta nafaheenna. Furuhu ma aha kala hormaynta jedwalkaaga, balse waa jedwal u samaynta hormooyinkaaga!**

— Stephen Covey

**436. Dadku badiyaa waxa ay ka cawdaan waqti la'aan iyada oo dhibta runta ah ee haysataa tahay jiho la'aan.**

— Zig Ziglar

**437. Sababta waqti badan loo lumiyo waxa si toos ah loola xidhiidhin karaa bilaa abbaaridda iyo bilaa dareen siinta!**

— Qoraha lama yaqaan

**438. U-maaraynta waqtiga si bilaa kala mudnaan ihi waxa ay ka dhigan tahay toogashada meel hadhowna dhihidda meeshii aad abbaartaba 'waa yoolkii'!**

— Peter Turla

**439. Idil ahaan maaraynta waqtigu waxa uu ka bilaabmaa qorshayn.**

— Tom Greening

**440. Haddii aanad waqti u hayn in aad sida saxda ah u qabatid, goorma ayaad waqti u heli doontaa in aad mar kale dib u soo wada billowdid?**

— John Wooden

**441. Weligeed ma jirayo waqti ku filan in wax kasta lagu qabto; balse waxa jira waqti ku filan in la qabto waxyaabaha u mudan.**

— Brian Tracy

**442. Haddii aad nolosha jeceshahay, waqtiga ha lumin. Waayo waqtigu waa waxa noloshu ku dhisan tahay!**

— Bruce Lee

**443. Warka xun ee aan kuu hayaa waa in 'waqtigu duulayo'. Warka wanaagsan ee aan kuu hayaana waa 'adiga aad duuliye ka tahay!.**

— Michael Althsuler

**444. Waqtigu waa shay la abuurto. Haddii aad tidhaahdid, "waqti ma hayo", waxa ay la mid tahay 'ma rabo in aan yeesho waqti'.**

— Lao Tzu

**445. Ha odhan, 'waqti igu filan ma haysto', waayo dhammaan dadkii dunidan wax ku soo kordhiyay maalintoodu waxa ay ahayd 24 saacadood ee kama ay badnayn!**

— Jackson Brown

**446. Waqtigu wuxuu kaa qaadan doonaa lacagtaada, laakiin lacagtu kuuma soo iibin karto waqti.**

— James Taylor

**447. Ilaa aan awoodno in aan maamulno waqtiga, ma maamuli karno wax kale.**

— Peter Drucker

**448. Dhibaatadu waxa ay tahay, waxa aad u haysataa in aad waqti haysatid!**

— Buddha

**449. Dhammaan guulaha waaweyni waxa ay u baahan yihiin waqti.**

— Maya Angelou

**450. Lacag waa aan heli karaa ama waayi ka karaa. Laakiin waqti waa aan waayi karaa uun. Sidaa darteed, waa igu waajib in aan si taxaddir leh u isticmaalo [waqtiga.]**

— Qoraha la ma yaqaan

**451. Yoolku waa riyo ay la socoto waqti'go'aano.**

— Diana Scharf Hunt

**452. Waa waqtigii waalidku bari lahaa da'yarta waqti hore, kala duwanaashuhu in qurux iyo awood laga heli karo.**

— Maya Angelou

**453. Laga yaabaa in aad dibdhacdo, laakiin waqtigu ma dibdhaco.**

— Benjamin Franklin

**454. Mararka qaar marka dadku ay ku jiraan cadaadis, waa ay necbaystaan in ay fekeran, waana waqtida ay ugu baahi badan yihiin in ay fekeraan.**

— William J. Clinton

**455. Maanta qof baa fadhiya hadhka, sababtoo ah qof baa beeray geedka waqti hore.**

— Warren Buffett

**456. Macno ma laha inta aad mashquulsan tahay, waa in aad waqti aad dadka kale dareensiiso in ay yihiin muhiim aad siisaa.**

— Mary Kay Ash

**457. Badi dadku waxa ay waqti iyo tamar badan ku bixiyaan ka wareegista dhibaato halkii ay isku deyi lahaayeen in ay xalliyaan.**

— Henry Ford

**458. Ma ahan in aan anigu ahay mid caqli badan, keliya waa in aan ku negaaday dhibaatada waqti dheer.**

— Albert Einstein

**459. Marna ha niyadjabin, waxaa kaa xiga uun waqti iyo meel in mawjaddu noqoto.**

— Harriet Stowe

**460. Haddii ay ahaan lahayd waqtiga ugu fiican ama waqtiga ugu xun, waa waqtiga keliya ee aynu haysanno.**

— Art Buchwald

**461. Waxa aynu ugu baahida badannahay waa waqtiga; waxa aynu ugu adeegsi xunnahayna waa isla waqtiga!**

— William Penn

**462. Ha ku dhegnaan xasuusahaaga; ha wanaagsanaadaan ama ha xumaadaan e, waayo kulligood waa wax tegay!**

— Yasmen Mogahed

**463. Waad khiyaameyn kartaa dadka oo dhan waqti kooban, dadka qaarna waligood waad khiyaameyn kartaa, lakiin waligood ma khiyaameyn kartid dadka oo dhan.**

— Abraham Lincoln

**464. Waqtigaaga ha ku lumin sharraxaad dheeri ah. Dadku waxa ay dhegaystaan waxa ay rabaan in ay maqlaan.**

— Paulo Coelho

**465. Dadka qaar waxa ay kula sheekaystaan waqtigooda firaaqada ah, dadka qaarna waqtigooda ayay ku firaaqeeyaan si ay kuula sheekaystaan!**

— Qoraha lama yaqaan

**466. Ma aha geesiyadu kuwo sameeya taariikhda, lakiin taariikhda ayaa ka dhigta geesiyo.**

— Joseph Stalin

**467. Keliya aqoonyahannada ayaa xor ah.**

— Epictetus

**468. Waxbarashadu waa Hooyada hoggaaminta.**

— Wendell Willkie

**469. Baraha wanaagsani waa sida madadaaliye wanaagsan marka hore waa in uu qabsado dareenka dhageystayaasha, kadibna waxa uu baraa casharkiisa.**

— John Henrik Clarke

**470. Subax kasta nafteyda waxa aan xusuusiyaa: Ma jiraan wax aan maanta iraahdo oo aan wax ka baran doono. Sidaa darteed haddii aan rabo in aan wax barto, waa in aan wax dhageystaa.**

— Larry King

**471. Aqoontu waa garashada wixii aad odhan lahayd, murtiduna waa garashada xilligii aad odhan lahayd!**

— Qoraha lama yaqaan

**472. Kan waxbarta laakiin aan fekerin, wuu qasaaray! Kan fekera laakiin aan waxba baranina, wuxuu ku jiraa khatar aad u weyn.**

— Confucius

**473. Kama xishoonayo in aan qirto in aan jaahil ka ahay wixii aanan aqoon.**

— Cicero

**474. Barashada sida wax loogu kalsoonaadu waa mid ka mida ah shaqooyinka nolosha ugu adag.**

— Isaac Watts

**475. Qofka albaabka dugsi fura, wuxuu xidhay xabsi.**

— Victor Hugo

**476. Waxbarashadu waa furaha lagu furo albaabka dahabka ah ee xorriyadda.**

— George Washington Carver

**477. Waxbarashadu ma aha barashada xaqiiqooyinka, laakiin waa u tababbarka maskaxda sidii ay u fekeri lahayd.**

— Albert Einstein

**478. Marka aynu dadka barayno fekerka waynu xoraynaynaa, markase aynu wax uun u yeedhinayno, waxa aynu ku daraynaa duur joogta.**

— Ali Izzat Begovich.

479. **Waxa ay calaamad u tahay maskax aqoon leh in la awoodo soo dhaweeynta aragti aan la aqbalin.**

— Aristotle

**480. Kuma filna in la haysto maskax wanaagsan; waxa ugu weyn waa in iyada si fiican loo isticmaalo.**

— Rene Descartes

**480. Haddii aanad doonayn in aad wax baratid, qofna kuma caawin karo. Haddii aad rabtose in aad wax baratid, ruuxna kuma hor istaagi karo.**

— Qoraha lama yaqaan

**481 Waxbarashadu ma aha barashada xaqiiqooyinka, balse waa ku tababaridda maskaxda in ay fekerto.**

— Albert Einsteina

**482. Waxbarashadu waa waxa keliya ee ruuxa u soo hadha marka uu illaawo wixii uu dugsiga ku soo bartay!**

— Albert Einstein

**483. Waxbarashadu waxay ka dhigan tahay holcinta shamac, ee ma aha buuxinta weel!**

— Socrates

**484. Waxbarashada lagama weynaado.**

— Alferd Williams

**485. Waa in uu qof waxbaro iyaga, haddii aanan anigu waxbarin, yaa waxbaraya? Haddii aan hadda wax la barin, goormaa wax la barayaa? Waa in aynu hadda qabannaa hawshaas.**

— Oral Lee Brown

**486. Waxa keliya ee aan odhan karo aniga ayay qeexitaan iga bixinaysaa waa in aan jeclahay in aan waxbarto. Waxa aan ka helaa farxad waxyaabaha cusub. Waxa aan gataa buug ka badan inta aan akhrin karo ama dhammayn karo.**

— Satya Nadella

**487 .Waxbarashadu ma aha hab looga baxsado saboolnimada, waa hab lagula dagaallamo iyada.**

— Julius Nyerere

**488. Macallinku waa in uu leeyahay maskax hal-abuur leh.**

— A. P. J. Abdul Kalam

**489. Weli lama aan kulmin ruux aqoon-darradiisu gaadhay heer aanan waxba ka faa'idin!**

— Galileo Galilei

**490. Dadka waxba ma bari karno, keliyaata waxa aynu ka caawin karnaa in ay aqoonta iyagu iska dhex raadiyaan!**

— Galileo Galilei

**491. Ninka yidhaahda, 'in igu filan waan bartay oo waxbarasho sii wadi mayo,' waa in loo arko in aanu wax garanayn.**

— Haile Selassie

**492. Qofka waxbarta laakiin aan ku dhaqmin wuxuu la mid yahay sida qof beer carro-rogay laakiin aan waxba ku beeran.**

— Saadi

**493. Maskaxaha u wanaagsan ee qaranku waxa laga yaabaa in ay ku jiraan safka u danbeeyay ee fasalka!**

— A.P.J. Abdul Kalam

**494. Natiijada ugu sarraysa ee o keligaa qol cidlo ah fadhiisato.**

— Dr. Seuss

**496. Isu dhuldhigga dadka aqoonta idin baray, isuna dhuldhiga dadka aqoonta aad barteen. Hana ka mid noqonina kibraaniinta aqoonta, oo yaanu cilmigiinu ku taagnaan jahligiina!**

— Omer bin Khaddaab

**497. Aqoon yar oo hawl gasha ayaa ka waxtarsan aqoon badan oo fadhiid ah!**

— Kahiil Gibran

**498. Qaadhaan kasta oo lagu darsado aqoonta runta ahi waa mid lagu darsaday awoodda aadanaha!**

— Horace Mann

**499. Aqoontu waa helidda warcelintii saxda ahayd. Muddakarnimaduna waa wayddiinta su'aashii saxda ahayd!**

— Qoraha lama yaqaan

**500. Aqoontu waa nolosha garaadka!**

— Abu Bakar As-siddiq

**501. Qof kasta oo aad mar uun la kulantaayi waxa uu yaqaanaa wax aanad hore u aqoonin.**

— Bill Nye

**502. Haddii aqoontu dhibaato abuuri karto, ma aha aqoondarrada tan aynu u adeegsanayno xalku.**

— Isaac Asimov

**503. Maalgelinta waxbarashada la geshaa waa tan ugu faa'idada badan.**

— Benjamin Franklin

**504. Ma jiro qof dhammeystirtay waxbarashadiisa isaga oo aan baran in lala noolaado dhibaatooyinka aan la xallin karin.**

— Edmund J. Kiefer

**505. Waxaa aad u ada! in aad ku dhex noqoto qof aqoon leh dal aan ku kalsoonayn maskaxda xorta ah.**

— James Baldwin

**505 Waxa aynu ku baranno si raaxo leh, weligeen ma hilmaamno.**

— Alfred Mercier

**506. Denbiyadu saamaynno taban oo badan ayay kugu leeyihiin. Mid ka mid ahi waa in ay kaa xadaan aqoonta!**

— Ibn Al-Qayyim

**507. Haddii dadku ogaan lahaayeen natiijada cuddoon ee dhex ceegaagta aqoonta, si dhab ah ayay u dalbi lahaayeen xataa haddii ay u qubayaan dhiigga wadnahooda una quusayaan gunta badweynta!**

— Imam Zain-ul-Abideen

**508. Haddii aan la doodo qof aqoon leh, aniga ayaa ka guulaysta; Haddii aan la doodo qof jaahil ahna, isaga ayaa guulaysta!**

— Imam Shafici

509. **Aqoonta waa la doontaa ee iyadu ma timaaddo!**

— Imam Malik

**510. Qofka aqoonta baadi doonaa waa qof xaqiiqada baadi doonaya. Qofkii xaqiiqada baadi doonaana xaqa ayuu jeclaadaa. Qofkii xaqa jeclaadaana runlow ayuu noqdaa. Qofka runlowga ahina waa geesi!**

— Dr. Cali Mustafa

**511. Macallinka u wanaagsani waa kan ku tusiya halka ay tahay in aad eegtid balse aan kuu sheegin waxa ay tahay in aad aragtid!**

— Alexandra K.Trenfor

**512. Aqoonta koowaadi waa aamusnida, ta labaadi waa dhegaysiga, ta saddexaadi waa qaybidda, ta afraadi waa hawlqabadka, ta shanaadina waa faafinteeda!**

— Al-Asma'i.

**513. Had iyo jeer doon in aad barato wax waxtar leh.**

— Sophocles

**514. Sirta waxbarashadu waa ixtiraamidda ardayga.**

— Qoraha lama yaqaan

**515. Haddii aynu rabno inaynu dunidan xasillooni dhab ah ka gaarno, waa in aan ubadkeenna waxbarnaa.**

— Mahatma Gandhi

**516. Waxbarashadu waxa ay bixisaa hal-abuurnimo. Hal abuurnimaduna waxa ay keensataa fekerrid. Fekeridduna aqoon. Aqoontuna waxa ay kaa dhigtaa mid sarreeya.**

— Abdul Kalam

**517. Xididdada waxbarashadu waa qadhaadh balse midhaheeda ayaa macaan ah!**

— Aristotle

**518. Qofku waa in uu shay uun wada yaqaannaa, shay kastana wax uun ka yaqaannaa.**

— Tawfiq Al-Hakim

**519. Waxa aan ummaddaan uga cabsanayo waxa ugu weyn ruux afka aqoonyahan ka ah, qalbigana jaahil ka ah.**

— Omer Bin Khaddaab

**520. Waxbarashadu ma aha u diyaargarowga nolosha. Waxbarashadu waa nolosha laftarkeeda.**

— John Dewey

**521. Weligay ardaydayda wax uma dhigin. Keliyaata waxa aan siinayay shuruudaha wax lagu barto.**

— Albert Einstein

**522. Bilaa waxbarasho, dunidan meelna uma dhaqaaqi kartid.**

— Malcolm X.

**523. Noqo arday isbeddel, waa waxa keliya ee aan isbeddeli doonin e.**

— Anthony J. D'Angelo

**524. Weligay waxba kuma baran hadal. Waxa aan wax bartay markii aan wax iswayddiiyay.**

— Lou Holtz

**525. Aqoonta waxaa ammaan ugu filan inuu sheegto qof aanba lahayn, haddii lagu sheegana uu ku farxo. Jaahilnimaddana waxaa xumaan ugu filan inuu iska diido qofkii ku sugnaa, haddii lagu sheegana uu ka xanaaqo.**

— Imam Shafi

**526. Iskajir aqoonta beenta ah, waa ka khatar badan tahay jaahilnimada.**

— George Bernard Shaw

**527.Ma ku baraa waxa ay aqoontu tahay? Marka aad garaneysid wax, sheeg in aad garaneysid; marka aanad garaneyn wax, oggolow in aanad garaneyn. Aqoontu waa taas.**

— Confucius

**528. Aqoonta aan ficil la socon waa wax aan waxba tarayn, ficil aan aqoon lahaynina waa waalli.**

— Imam Ghazali.

**529. Qoraa waliba wuu dhiman doonaa, wuxuu gamcihiisa ku qorayna wax ka danbeeya oo ka hadha ayay noqon doonaan; ha qorin wax aanad ku farxi doonin maalinta qiyaamaha in aad aragto!**

— Qoraha lama yaqaan

**530. Qofka inta uu wax curiyo dadka la wadaagaa waxa uu la mid yahay qof inta uu caqligiisii weel ku soo riday dadka la wadaagaya!**

— Xasan Xaydar

**531. Buugaagta iyo wax kasta oo la qoro waa ay argagax geliyaan kuwa raba in ay daboolaan runta.**

— Wole Soyinka

**532. Haddii aad rabto in aad dal barato, akhri qorayaashiisa.**

— Aminatta Forna

**533. Sida uu u jiro qoraal hal-abuur ah, ayuu u jiraa akhris ha-abuur ahina!**

— Ralph Waldo Emerson

**534. Hal buug oo aad u fiicani waxa uu u dhigmaa boqol saaxiib oo wanaagsan, balse hal saaxiib oo wanaagsani waxa uu u dhigmaa maktabad iska dhan!**

— Abdul Kalam

**535. Tani waa wax u gooniya buugaagta; waxa ay kuu oggolaanayaan in aad socdaasho adiga oo aan tallaabo qaadin.**

— Jhumpa Lahiri

**536. Akhristuhu waxa uu noolaadaa kun nololood!**

— Qoraha lama yaqaan

**537. Sababta aan wax u qoraa keliya waa dareenka i gubaya. Haddii aanan qori lahayn, ma aan awoodeen in aan xasilooni helo.**

— Ba Jin

**538. Wax kasta oo aad hammad u hayso waa in aad samaysaa. Haddii aad rabto in aad wax qorto, wax ka qor wax aad garanayso.**

— Jackie Collins

**539. Qoraaga waa in uu jiraa cod dhexdiisa ka leh, 'Runta sheeg.' Muuji waxoogaa siro ah.**

— Quentin Tarantino

**540. Buugaagtu waa markabyo kuwaas oo dhex maraya badaha ballaaran ee waqtiga.**

— Francis Bacon

**541. Meel kasta oo ay buugaag ku gubaan sidoo kalana, ugu danbeynta, dadka ayay gubi.**

— Heinrich Heine

**542. Wax aan akhris ahayn ma samayn gacaliye. Hantida dadka kale waxa ay ku tiirsan tahay lacagta noodhka ah, hantidayduna waxa ay ku tiirsan tahay ladhadhka (cinwaannada) buugta. Qof hantiile ah ayaan ahay sida aad u jeeddid. Waa aan akhriyay wax kasta oo gacantayda soo galay, si la mid ah sida ay iyaguba u boobeen wax kasta oo gacantooda soo galay!**

— Ahlam Mosteghanemi

**543. Nin kasta oo wax badan akhriya maskaxdiisana in yar isticmaala wuxuu ku dhacaa caadooyinka caajis ee fekerka.**

— Albert Einstein

**544. Qofka aan rabin in uu wax akhriyo kama faa'iido badna qofka aan wax akhrin karin.**

— Mark Twain

**545. Dunida oo dhan ayaa isukay furtay markii aan bartay sida wax loo akhriyo.**

— Mary McLeod Bethune

**546. Haddii aanad ka helin qof sheekadiisa, adigu sheeko kuu gaar ah qor.**

— Chinua Achebe

**547. Ma aha in aad gubto buugaag si aad u burburiso dhaqan. Keliya dadka ka jooji in ay akhriyaan.**

— Ray Bradbury

**548. Haddii uu jiro buug aad rabto in aad akhrido, laakiin aan weli cid qorin, markaas waxaa aad ku qasban tahay in aad adigu qortid.**

— Toni Morrison

**549. Mar allaale marka aynnu dhammayno akhrinta buug, waxa aynu ka dhigannahay sidii qof macasalaameeyay saaxiib qaali ku ahaa!**

— Dr. Cabdikarim Bakkaar

**550. Qoraagu waa in uu lahaadaa hal-adayga abwaanka iyo suuraynta (khiyaalka) saynisyahanka.**

— Vladimir Nabokov

**551. Buug kasta oo aad qaaddo waxaa ku jira cashar ama casharro u gooni ah, marar badanna buugta xumi waxa ay leeyihiin barid ka badan kuwa wanaagsan.**

— Stephen King

**552. Qoriddu waa fekerid. Si aad si fiican wax ugu qortid, waa in aad si cad u fekertaa. Waana taa sababta ay u adag tahay.**

— David McCullough

**553. La wadaag dadka aqoontaada. Waa habka lagu gaadho nolol weligeed ah.**

— Dalai Lama XIV

**554. Akhristaha wanaagsan, akhristaha sare, akhristaha firfircoon ee hal abuurka lihi, waa ka laba akhriya!**

— Vladimir Nabokov

**555. Hal cunug, hal bare, hal qalin iyo hal buug ayaa dunidan wax ka beddeli kara!**

— Malala Yousafzai

**556. Qofka aan akhriyin buugta wanaagsani waxba ma dhaamo qofka aan akhriyi karin.**

— Mark Twain

**557. Akhrinta buugta wanaagsan oo dhani waxa ay la mid tahay la sheekaysiga dadkii ugu wanaagsanaa qarniyadii tegay!**

— Rene Descartes

**558. Ama qor wax u qalma in la akhristo, ama samee wax u qalma in wax laga qoro.**

— Benjamin Franklin

**559. Wax-akhrisku waxa uu ii yahay hab aan ku ballaadhiyo garaadkayga, ku kala furo indhahayga, kuna buuxiyo qalbigayga.**

— Oprah

**560. Caalamku waa sida buugga, qofkii aan safrin wuxuu la mid yahay qof buug hal bog oo keliya ka akhriyey.**

— St. Augustine

**561. Bilaa buug haddii aan ahaan lahaa, beri hore ayaan waalan lahaa.**

— Domien Echols

**562. Buuggu waa maquuno (hadyad) aad mar kasta iska furanaysid.**

— Garrison Keillor

**563. Marka buug la qorayo qaybtee baa u wanaagsan? Dhammaystirka!**

— Rick Riordan

**564.Haddii aad doonaysid in aad noqotid qoraa, waa in aad laba shay samaysaa ugu horrayntaba; wax badan akhridaa wax badanna qortaa.**

— Stephen King

**565. Haddii uu jiro buug aad rabtid in aad akhridid balse aan weli la qorin, waa in aad adigu qortaa.**

— Tani Morrison

**566. Waxaa jira dembiyo ka xun in buugaag la gubo. Mid ka mid ahi waa in aan la akhriyin iyaga.**

— Joseph Brodsky

**567. Ma jiro saaxiib u daacad ah sida buuggu daacad u yahay.**

— Ernest Hemingway

**568. Qol buugaag la'aan ahi waa sida jidh bilaa naf ah.**

— Marcus Tullius Cicero

**569. Inta aanad hadlin ka hor, feker. Inta aanad fekerin ka horna, akhri.**

— Fran Lebowitz

**570. Ma jiraan dad aan waxba galabsan oo ku nool dal denbiile ah.**

— Nadeem Aslam

**571. Haddii aanad baabbi'in karin caddaaladdarro, ugu yaraan qof walba ogaysii caddaaladdarrada jirta.**

— Shirin Ebadi

**572. Xukuumadda iskama laha dad koobani, waxaa ay ka dhexaysaa guud ahaan dadka.**

— Narendra Modi

**573. Marka aad ruuxa dulmiga wada ku leedahay 'caddaalad same,' waxa aad la mid ah adiga oo ku leh nin waalan 'caqli yeelo;' waayo ninka waalani waxa uu isu haystaa in uu dadkaba ugu caqli wanaagsan yahay!**

— Cali al-Wardi

**574. Waxa aan si xooggan u aamminsanahay caddaalad-la'aan in aanay nabad jirayn. Nabad waartaa ma jiri doonto, si kastoy ahaatаba.**

— Angelina Jolie.

**575. Baraha bulshadu waa dad-simaha ugu dambeeyay. Waxa ay cod iyo minbar siiyaan qof kasta oo raba in uu ku lug yeesho.**

— Amy Jo Martin

**576. Dunidu ma aha mid caddaalad ah, oo inta badan nacasyada,**

**fulayada, beenalayaasha iyo danaystayaashaa ayaa ku dhuunta meelaha sare.**

— Bryant H. McGill

**577. Ka bilow, 'maxaa sax ah.' halkii aad ka bilaabi lahayd, 'maxaa la aqbali karaa.'**

— Franz Kafka

**578. Marka ay taagan tahay sharafta aadane, ma sameyn karno xal dhexdhexaad ah.**

— Angela Merkel

**579. Ma aha in waddaniyaddu ku indho-tirto oo aad wajihi kari weydo xaqiiqada. Qalad waa qalad, ciddii doontaa ha sameyso ama ha tidhahdo e.**

— Malcolm X

**580. Waxa aad raadsataa waa uu ku raadsadaa!**

— Jalaala'ddiin AlRumi

**581. Kuwa ugu oohinta dheer ma aha had iyo jeer kuwa waxyeelada ugu xumi soo gaadhay.**

— Aesop

**582. Qofku waa in uu raalli ku yahay in uu u dhinto caddaalad. Dhimashadu waa xaqiiq lama huraan ah maalin kastana dadku waa dhintaan, laakiin camalka wanaagsan weligiis wuu noolaanayaa.**

— Jesse Jackson

**583. Dalabaadka u horreeya ee ilbaxnimo rabtaa waa caddaalad.**

— Sigmund Freud

**584. Caddaalad bilaa ilaalo (awood) ahi waa bilaa tamar; awood bilaa caddaalad ahina waa bilaa arxan!**

— Blaise Pascal

**585. Nabadda runta ahi ma aha keliyaata maqnaanshiyaha dagaal, balse sidoo kale waa joogista caddaalad.**

— Jane Addams

**586. Qasku waxa uu dhalaa qas. Falal kasta oo qas ah la isna leeyahay caddaalad ku xoojiya, xuquuq ku soo dhiciya, ama nabad ku adkeeya, ma dhammeeyaan qaska. Waxa ay keliya sii diyaariyaan siina xoojiyaan waaridda qaska!**

— Wendell Berry

**586. Nabad iyo caddaalad waa labada dhinac ee hal shilin.**

— Dwight D. Eisenhower

**587. Haddii aynaan caddaaladda daryeelin, caddaaladdu inama daryeelayso!**

— Francis Bacon

**Meeshii caddaaladda la dafiro, meeshii saboolnimadu xoogaysato, meeshii aqoondarridu shaac-baxdo, meeshii hal dabaqad oo dadka ka mid ahi isdareensiiso in bulshadu tahay hilib u dayacan in la dulmiyo, la boobo lana sharaf-rido; meesha noocaas ah mood iyo nool toona ma badbaado!**

— Frederick Douglass

**588. Haddii aanad taxaddarin, wargeysyadu waxa ay kaa dhigi doonaan mid naca dadka la dulmiyay oo jeclaada dadka wax dulmiyay!**

— Malcolm X

**589. Caddaalad-darrida hal meel ka jirtaayi waxa ay halis ku tahay caddaaladda meel uun ka jirta.**

— Martin Luther king, JR.

**590. Haddii aad aaminsan tahay caddaaladda, run ahaan waxa aad aaminsan tahay Aakhiro; sababta oo ah adduunkan wax caddaalad ahi kama jirto!**

— Moumin Ali Khan

**591. Sadaqadu waxa ay ka bilaabantaa guriga, caddaaladduna waxa ay ka bilaabantaa albaabka ku xiga albaabkaaga.**

— Charles Dickens.

**592. Dadku marka ay saaxiib yihiin caddaalad uma baahna, balse marka ay caddaalad haystaan saaxiibtinnimo waa u baahan yihiin.**

— Aristotle

**593. Waan xukumay, markaasaan caddaalad sameeyay, markaasaan Ammaan helay, markaasaan seexday.**

— Omer Bin Khaddaab.

**594. Ma gaari doontid meesha aad u socotid haddii aad u istaagto dhagax-ku-tuuryeynta ey kasta oo ciya.**

— Winston Churchill

**595. Waxaa nalagu salliday qoom isu haysta in iyaga mooyee aanu Ilaahay cid kale hadayn.**

— Ibn Sīnā

**596. Labada dagaalyahan ee ugu xoogga badani waa Waqtiga &**

**Samirka.**

— Leo Tolstoy

**597. Fulayadu waxa ay dhintaan marar badan ka hor dhimashadooda; geesiyaduna hal mar uun mooye ma dhadhamiyaan geerida.**

— William Shakespeare

**598. Haddii aynaan dagaalka dhammayn, dagaalkaa innaga ina dhammayn doona.**

— H. G. Wells

**599. Kuguma taageersani waxa aad leedahay, laakiin xaqaaga waan difaacayaa aanba ku dhinto e.**

—Voltaire

**600. Haddii aanad daraaddeed u dhimanayn, erayga "Madax bannaani," ka saar qaamuuskaaga.**

— Malcom X

**601. Had iyo jeer iska cafi cadowgaaga; ma jiro wax kaga cadhaysiin badan in la cafiyo.**

— Oscar Wilde

**602. Waxa aan arkay ubad macaluuli hayso. Waxa aan arkay Hooyooyin iyo xaasas silcaya. Waan necbahay dagaalka.**

— Franklin D. Roosevelt

**603. Dhigataan e. Waxa idinka soo hor bixi doona dad naftooda uhuray daboolidda baahiyaha aas-aasiga ah; far ha saarina!**

— Abu-Bakar as-Siddiq

**604. Haddii aad rabto in aad qaran burburiso adigoon la dagaalin, ka dhig sinada ama qaawanaanta wax iska caadi ah jiilka dhallintayarta ah dhexdooda.**

— Saladin

**605. Waa wax aan waxtar lahayn in aad ciidan ka dhan ah u dirto fekrado.**

— Georg Brandes

**606. Waa in aad digtooni u yeelataa cadowgaaga, waayo iyagu waxa ay yihiin kuwa ugu horreeya ee qaladkaaga ogaanaya.**

— Antisthenes

**Marka hodanku isdagaalayo, saboolka ayaa ku dhex dhinta!**

— Jean-Paul Sartre

**607. Ha u jahaadin sidii aad u guuleysan lahayd, laakiin door-bid sidii aad qiimo u yeelan lahayd.**

— Albert Einstein

**608. Weligaa dagaal haku qaadin dad fool-xun, wax ay waayaanba ma Jiro. In aad dagaalka isu diyaarisaa waa mid ka mid ah hababka ugu firfircoon ee nabad lagu dhalin karo.**

— George Washington

**609. Si aad dal u qabsatid waa in aad hub-dhigis ku samaysaa shicibkiisa.**

— Adolf Hitler.

**610. Annagu ma danayno suurtagal nimada guuldarrooyinka Maba jiraan!**

— Queen Victoria

**611. Dagaalka waxna ma joojin karaan jeerooy dadku diidaan in ay ka qayb qaataan dagaalka.**

— Albert Einstein

**612. Haka cabsan weligaa in aad u istaagto runta, xitaa haddii ay taasi kaa dhigayso keli.**

— Dr. Bilal Philips

**613. Habka ugu fiican ee cadow lagu baabbi'iyaa waa in saaxiib laga dhigto.**

— Abraham Lincoln

**614. Dadka waaweyni dagaalka uun bay ku dhawaaqaan, cidda ay tahay in ay dagaalamaan dhintaanna waa dhalinyarada!**

— Herbert Hoover

**615. Dadku badiyaa waxa ay dagaalka galaan marka ay leeyihiin, "nabadda ayaannu jecelnahay."**

— David Herbert Lawrence

**616. Kuwa dhintay oo keliya ayaa isha ka soo qaaday dhammaadka dagaalka!**

— Plato.

**617. Dagaalku wax lagu farxo ayuu u yahay kuwa aan wax khibrad ah ka haysan!**

— Desiderius Erasmus

**618. Sida ugu habboon ee dad loo baabbi'iyaa waa in la diido lana tirtiro garashada taariikhdooda.**

— George Orwell

**619. Haddii aanad naftaada ku kalsooneyn, labo jeer ayaa lagaa**

**adkaaday loolanka nolosha.**

— Marcus Garvey

**620. Cadawgaaga cafi, laakiin waligaa ha illaawin magacyadooda.**

— John F. Kennedy

**621. Ka daciifka ahi marna wax ma cafin karo. Cafisku waa sifada kuwa xoogga badan.**

— Mahatma Gandhi

**622. Bambooyin iyo boskoolado ma sameeyaan kacdoon. Middida kacdoonka waxa lisa (afeeya) afkaar sal adag leh!**

— Sardar Bhagat Singh

**623. U muuqo daciif marka aad adagtahay, una muuqo adayg marka aad daciifka tahay.**

— Sun Tzu

624. **Haddii aad raadineyso aargoosi, qod labo xabaalood – oo mid naftaada ugu talagal**

— Douglas Horton

**625**. **Dagaalka ninka kaalinta labaad galay wax abaal-marin ahi uma diyaar aha!**

— General Omer N. Bradley

**626. Dagaalka kuma sugna wax sharaf ah oo u qalantauu qabo in lagu illaawo.**

— Dwight Eisenhower

**627. Waxa jiray, oo weliba badnaa, da'yar badan oo aan weligood dagaal ka qayb qaadan, haddana damac la'aantooda ka qayb galka dagaalku aanu sidaa u sii fogayn.**

— Thucydides

**628. Waxa aan ka raadiyay cadawga meel kasta, waan ku guuldarraystay in aan ku arko hortayda!**

— Steven Pressfield

**629. Waxaa iska leh dabeecadda aadanaha in ay necbaystaan kuwa ay dhaawaceen.**

— Tacitus

**630. Waddaniyiinta si iskood ah ugu dagaalama waddanka iyo xuquuqdiisa, ayaa sameeya askarta loogu kalsooni badan yahay adduunkan guudkiisa.**

— Stonewall Jackson

**631. Haddii aad rabtid in aad dagaalka joojisid, halka aad qoryo ka diraysid dir buugaag, halka aad taangiyo ka diraysid dir qalimaan, halka aad askar ka diraysidna dir macallimiin!**

— Malala Yousafzai

**632. Waa in aanad hal cadow dhawr jeer la dagaalamin haddii kale, waxa aad isaga bari doontaa tabahaaga dagaal oo dhan.**

— Napoleon Bonaparte

**633. Farshaxanka sare ee dagaal waa in la jebiyo cadow iyada oo aan lala dagaalin.**

— Sun Tzu

**634. Ujeeddada dagaalku waa in nabad la helo... Ujeeddada nabadduna waa in dagaal la isu diyaariyo!**

— Sun Tzu.

**635. Meeshii lacag soo gasho, dagaal baa soo gala.**

— Marian Anderson

**636. Dagaalku waa barta dadka waaweyni dhallinyarta iyo doqmaha ay isku diraan si ay isu laayaan!**

— Niko Bellic

**637. Marka ay qaran ku hareeraysan yihiin quruumo hubaysan, waa in uu isna is-hubeeyaa.**

— A. P. J. Abdul Kalam

638. **Dagaal weligii xal waara umuu noqon dhibaato.**

— A. P. J. Abdul Kalam

**639. Marna isma dhiibayno. Ama waa aanu guulaysan ama waa aanu geeriyoon. Waa in aad u dagaalantaa faca danbe iyo kuwa ka sii dabeeya, aniga miyaa? Anigu kollayba waa aan ka cimri weynahay kan i deldelaya!**

— Omar al-Mukhtaar

**640. Carrabku waa sida mindi af badan... isaga oo aan dhiig kaa daadin ayuu ku dilaya.**

— Buddha

**641.Quurso cadowga istraatiji ahaan, laakiin xeelad ahaan isaga si dhab ah u qaado.**

— Mao Zedong

**642. Hanti-wadaaggu ma aha jacayl, balse waa dubbe aan u isticmaalno ku burburinta cadawga.**

— Mao Zedong

**643. Uma oggolaan doono ruux cago uskag leh dhigayaa in uu garaadkayga ku dul lugeeyo!**

— Mahatma Gandhi

644. **Hoggaamiyaha aan ka labalabayn inta aanu dalkiisa dagaal gelin ka hor uma qalmo in uu hoggaamiye noqdo.**

— Golda Meir

**645. Ciidan libaaxyo ah oo ay xukunto deero weligood ma noqon doonaan ciidan libaaxyo ah.**

— Napoleon Bonaparte

**646. Dagaal ha gelin haddii aanad waxba ka helayn marka aad ku guuleysato.**

— Erwin Rommel

**647. Mararka qaar waa in aad qori qaaddaa si aad qori kale hoos ugu Dhigto.**

— Malcolm X

**648. Xilliga dagaalka, ubad, dumar iyo cirroole midna ha dilina. Dhirta waxba ha u geysanina, hana gubina; dhirta midhaha leh weliba. Ha iska laynina xoolaha cadawga, daysta aad cunno ka dhigataan e. Waxa idinka soo hor bixi doona dad naftooda u huray daboolidda baahiyaha aas-aasiga ah; far ha saarina!**

— Abu-Bakar as-Siddiq

**649. Haddii aad rabto in aad qaran burburiso adigoon la dagaalin, ka dhig sinada ama qaawanaanta wax iska caadi ah jiilka dhallintayarta ah dhexdooda.**

— Saladin

**650. Waa wax aan waxtar lahayn in aad ciidan ka dhan ah u dirto fekrado.**

— Georg Brandes

**651. Waa in aad digtooni u yeelataa cadowgaaga, waayo iyagu waxa ay yihiin kuwa ugu horreeya ee qaladkaaga ogaanaya.**

— Antisthenes

**652. Marka hodanku isdagaalayo, saboolka ayaa ku dhex dhinta!**

— Jean-Paul Sartre

**653. Ha u jahaadin sidii aad u guuleysan lahayd, laakiin doorbid sidii aad qiimo u yeelan lahayd.**

— Albert Einstein

654. **Weligaa dagaal haku qaadin dad fool-xun, wax ay waayaanba ma jiro.**

— Robin Williams

**655. Farxadi waxa ay u sugnaatay ninka jebiya silsiladaha garaadka dhaawaca, kana guulaysta werwerka mar iyo mararba!**

— Ovid

**656. Waxa aan mar maqlay qeexitaankan: Farxaddu waa caafimaad iyo xusuus gaaban! Wanaagsanaan lahaydaa in uu aniga ahaan laha qofka hadalkaas yidhi, maxaa yeelay waa hadal dhab ah.**

— Audrey Hepburn

**657. Gabayga waxaa keena farxad badan ama murugo badan.**

— A. P. J. Abdul Kalam

**658. Marka aan qof wax siiyo ee aan eego wajigooda, waa ay i farxad gelisaa.**

— Jackie Chan

**659. Ha illaawin afkaaga looma abuurin oo keli ah in uu wax cuno hadal batana, ee sidoo kale, waxa loo abuuray in uu dhoolla caddeeyo e!**

— Maxamed Radbaan.

**660. Waxa ay ahayd in aad ka soo bilaabo xagga hoose oo aan si qunyar ah u gaaro meel kasta oo aad u taqaannid 'figta'. Waa aan ku faraxsanahay in aan sameeyay.**

— Simon Cowell

**661. Farxadda runta ahi waa... ku raaxaysiga waqtiga hadda lagu jiro, iyada oo aanu ku ladhnayn ka werwerka mustaqbalku.**

— Lucius Annaeus Seneca

**662. Farxad waxa aad heli kartaa marka aad awooddo in aad naftaada ka xoreyso dhammaan waxyaabaha kaa jeedin kara farxadda.**

— Saul Bellow

**663. Haddii ay farxaddaadu ku xidhan tahay waxa qof kale sameeyo, waxa aan u malaynayaa dhibaataa ku haysata.**

— Richard Bach

**664. Waxa farxadda samaynayaa ma aha waxa aynu haysanno inta ay le'eg yihiin, laakiin waa intee in le'eg baynu ku raaxaysannaa.**

— Charles Spurgeon

**665. Ka jawaab wicitaan kasta oo ruuxdaada raalli gelinaya.**

— Jalaala'ddiin AlRumi

**666. Waxa aan gurigayga iska fadhiistaa aniga oo aan faraxsanayn murugaysnaynna, dhexdhexaad... waana isugu kay mid in aan keligay ahay iyo in la i weheliyaa!**

— Mohamed Darwish

**667. Dadku ma kala ogaado in ay tahay jiilaal iyo in ay tahay xagaa marka ay faraxsan yihiin.**

— Anton Chekhov

668. **Lacagtu ma keento farxad iyo hal-abuur. Hal-abuurkaaga iyo farxaddaada ayaa keena lacag.**

— Sam Rosen

**669. Farxaddu ma aha haysashada wax aad rabtay. Waa mahadinta waxa aad haysato.**

— Qoraha lama yaqaan

**670. Haddii aad faraxsan tahay, farxaddu iyada ayaa ku soo doonanaysa. Sababta oo ah farxaddu waxa ay timaaddaa meeshii farxadi taallo!**

— Yogi Bhajan

**671. Si aad u faraxdid waa in aad adeegsataa iftiinkaaga kuu gaarka ah!**

— C.E. Jerningham

**672. Qofka faraxsan ma aha qof ku jira xaalad aan isbedbeddalayn, laakiin waa qof ku jira dabeecad aan isbedbeddalayn.**

— Hugh Downs

**673. Waxa aynu kala doorannaa farxadda iyo murugada ka hor inta aynaan la kulmin.**

— Khalil Gibran

**674. Sababta aasaasiga ah ee farxad la'aantu weligeed may noqon xaalad, laakiin waa sida aad u aragto xaaladda.**

— Napoleon Hill

**675. Gabaygu wuxuu ku bilawdaa farxad kadibna wuxuu ku dhammaadaa xikmad.**

— Robert Frost

**676. Saaxiibtinnimadu waxa ay laba-laabtaa farxadaha waxaanay qaybisaa calool-xumada.**

— H. G. Bohn

**677. Alla maxaa ka farxad badan ruuxa marka uuna cidna**

**macasalaamaynayn cidna uuna sugayn!**

— Maxamed Darwish

**678. Waxa aan bartay in aan ka raadiyo farxaddeyda xaddidaada damacayga, halkii aan isku deyi lahaa in aan raalli-geliyo.**

— John Stuart Mill

**679. Farxaddu waa sida dhunkashada. Waa in aad wadaagtaa iyada si aad ugu raaxaysatid.**

— Bernard Melze

**680. Farxaddu ma aha wax aad waayo-aragnimo ka heshay, waa wax aad xusuusato.**

— Oscar LeVant

**681. Saynisku wuxuu innoo ballanqaaday runta. Weligiis innoomuu ballanqaadin nabad ama farxad midna.**

— Gustave Le Bon

**682. Farxadda ugu weyn ee noloshu waa in ay innaga dhaadhacsantahay in layna jecel yahay.**

— Victor Marie Hugo

**683. Ciddii tiri lacagtu kuuma iibin karto farxad ma yaqaannaan meesha laga dukaameysto.**

— Gittel Hudnick

**684. Jacaylku waa sayidka furayaasha fura iriddaha farxadda.**

— Oliver Wendell Holmes

**Ma jirto farxad marka laga reebo ta ku jirta ogaanshaha in aynu wax ku guuleysannay.**

— Henry Ford

**685. Laga yaabaa in waxqabadku aanu badanaa keenin farxad; balse wax farxad ahi kuma jirto waxqabad la'aanta.**

— Benjamin Disraeli

**686. Guushu waa helidda waxa aad rabto; farxadduna waa rabitaanka waxa aad heshay.**

**— Dale Carnegie**

**687. Mid ka mida furayaasha farxaddu waa xusuus xun.**

— Ritz Mae Brown

**688. Inta aad raadineyso farxad-gelinta dadka kale, waxa aad u heli doontaa naftaada farxad.**

**— Qoraha la ma yaqaan**

**689. Ma soo dhici doontid haddii aanad fuulin [meel sare]. Laakiin wax farxad ahi kuma jirto in aad noloshaada oo dhan ku noolaatid dhulka.**

**— Qoraha la ma yaqaan.**

**690. Ha u oggolaan farxaddaadu in ay ku tiirsanaato walxo aad waayi kartid.**

— C.S. Lewis

**691.Aqoonta waxa suuragalka ahi waa bilowga farxadda.**

— George Santayana

**692. Laga yaabaa in aanad noqon qofka ugu sarreeya, laakiin haddii aad qabaneyso wax aad jeceshahay, waxaa ku jira farxad ka badan in hodan ama caan la noqdo.**

— Tony Hawk

**693. Guurka farxadda lehi waa wada-hadal dheer kaas oo u muuqda in uu aad u gaaban yahay.**

**— Andre Maurois**

**694. Ma aha jacayl la'aanta, laakiin saaxiibtinnimo la'aan ayaa ka dhigta mid aan farxad lahayn guurka.**

— Friedrich Nietzsche

**695. Habka ugu fiican ee naftaada loo farxad geliyo waa in aad qof kale farxad geliso.**

— Mark Twain

**696. Farxaddu waa marka fekerkaaga, odhaahdaada iyo ficilkaagu iswaafaqaan.**

— Mahatma Gandhi

**697. Waxa aan doorbidayaa in aan naf ahaantay ku faraxsanaado intii aan ku murugoon lahaa aniga oo isku dayaya farxadgelinta cid kale!**

— J. Cole.

**698. Dadka qaarbaa farxadda sabab u noqda meel kasta oo ay tagaan; qaarna, meel kasta oo ay ka tagaan ayay farxadda sabab ugu noqdaan!**

— Oscar Wilde

**699. Markii aan 5 jirka ahaa ayay Hooyaday ii sheegtay in furaha noloshu yahay farxadda. Markii aan dugsiga tegay ayay i wayddiiyeen waxa aan rabo in aan noqdo marka aan koro, waxa aan u qoray 'qof faraxsan.' Waxa ay ii sheegeen in aanan fahmin wayddiinta aniguna waxa aan u sheegay in aanay iyaguna fahmin nolosha!**

— John Lennon

**700. Guushu ma aha furaha farxadda. Farxadda ayaa ah furaha guusha. Haddii aad jeceshahay waxa aad qabaneysid, waad guuleysan doontaa.**

— Albert Schweitzer

**701. Dadku keliya waxa ay farxi karaan marka ayna iska dhaadhicin waxa loo nool yahayba in ay tahay in la farxo oo keliya.**

— George Orwell

**702. Qof kasta oo faraxsani cid kalena waa uu farxadgelin karaa. Qof kasta oo leh dhiirranaan iyo iimaanna uma dhinto quus.**

— Anne Frank

**703. Dadka ugu badan ee farxadda iyo baraaraha ku nooli waa dadka eega waxa ay haystaan, balse aan eegin waxa dad kale gacantooda ku jira.**

— Ibraahim al-fiqi.

**704. Hodanku wuxuu dhacaa saboolka, saboolkuna midkoodba kan kale ayuu sii dhacaa.**

— Sojourner Truth

**705. Marnaba kama tijaari doontid in aad qof kale u shaqayso.**

— Felix Dennis

**706. Ma jiro wax sharci-darro ah haddii boqol nin oo ganacsato ahiay go'aansadaan in ay sameeyaan.**

— Andrew Young

**707. Ha uga faa'idaysan diintaada in aad adduun ku dheeftid. Aakhiro ayaa lagu dheefaa diinta e.**

— Sh. Abdulqadir Al-Jilani

**708. Ganacsiga dhexdiisa, wax naf leh qof keli ahi ma qaban karo ee waxa qabta koox wada jirta.**

— Steven Jobs

**709. Fursadaha ganacsi waa sida basaska oo kale, mar walba waxaa imanaysa mid kale.**

— Richard Branson

**710. Meel kasta oo aad ku aragto ganacsi guuleystay, qof baa mar**
**sameeyey go'aan geesinnimo ah.**

— Peter Drucker.

**711. Sirta ganacsigu waa in aad ogaatid wax aanay cid kale ogayn.**

— Aristotle Onassis.

**712. Shaqadu waa billowg aqoonta, sida uu dabku u yahay billowga iftiinka.**

**713. Shaqadu waa farxadda iyo dahaarka nolosha.**

**714. Shaqadu waxa ay leedahay farxad badan. wax qabad kuna shaqo badan.**

**715, Guushu waa macaan.waxayse aad usii macdahay inay kaa soo daahdo ee ay kuu timaado halgan iyo guuldarooyin ka dib.**

**716, Waxa kaliya ee ay dadku is dhaafsan karaan waa wada shaqayn**

**717. Shaqadaada oo aad wanaajisay waa mustaqbal kaaga oo aad wanaajisay.**

**718, Laba garab ama laba baal ayaa loo baahan yahay si loo duulo.**

719, Waa joogtaynta iyo dadaal, kuwa ka bur buriya ee ka xaaqa Caqabadaha waddada guusha.

720, Calafkaagu shaqo wuu ku siiyaa, laakiin kuguma hayo.

721, Dadka qaar, waxay u arkaan arrimaha sida ay yihiin.hadana waxay isweydiiyaan sababta, dadka qaarna waxay ku riyoodaan arrimo aan waligood dhicin.hadana waxay iswaydiiyaan, sababta ay u dhici waayeen.

722, Hawlgabku waa erayga ugu xun ee ku jira luuqadaha dunida.

723, Sirta guusha waa inaad ogaato wax ayna qofna ogayn

724., Wax ka joojin kara ma leh Qofka sida wanaagsan u fikira inuu gaaro himiladiisa. wax dhulka jooga ka caawin karana malaha qofka sida xun u fikira.

725, Shaqadu waa balaarinta iyo Xoojinta jiritaanka Qofka.

726 Guushu waa dadaalo yar yar, oo maalinba maalinta kale loo geeyay.

727, Faraqa u dhexeeya qofka guuleystay iyo qofka aan guuleysan maahan awood la'aan iyo aqoon la'aan ee waa hadaf iyo himilo la'aan.

728., Shaqadu markasta waa gacmo furnaan.

729., Mustaqbalka wuxuu ku xiran yahay waxa aan samaeyno maanta.

730, Hibada guushu kama badna inaad waxa aad awoodo si wanaagsan u samayso

731, Markasta waxaa dhaca waxa aad sida dhabtaa u rumeysan tahay, rumeysnaantaaduna waa waxa suurto galiso iney dhacaan waxyaabahaasi.

732, Marka aad ka hadlayso shaqo, U hadal si daacadnimo ah.

733, Qofkasta oo naga mid ah waxaa uu leeyahay awood nolosha macno u yeeli karta.

734, Shaqadu waa quruxda nafta iyo heybadda sharafta.

735, Sirta helista guusha runta ah, waa inaad hesho qad maalmeedkaaga Si sax ah.

736, Shaqadu waa daahfurka nafteena iyo dadka kale.

737, Dadka guulaystay waxay ku horumareen, waqtigii ay dadka kale lumiyeen oo ay iyagu dhowreen.

738, Qofka aan doonayn inuu wax kasta noqda waa qofka aan doonayn inuu jiro.

739, Erayada aanay la socon ficil, muhiim ma aha.

740, Waqti yar oo kasta wax yar samee.

741, Dhiiranaantu waa wadada ugu wanaagsan ee mustaqbal lagu samayn karo.

742, Shaqadu xiiso malaha haddii aadan adigu xiisaynayn.

743, Xakabyada jaranjaradu ma aha micneheedu inuu qofku ku nasto, laakiin waxaa loogu sameeyay inuu qofku cuskado marka uu qofku cagahiisa midba marqaadayo.

744, Haddii aadan wax rajayn ma helaysida waxa rajada ka dambeeyo.

745, Fikiraduhu wa boqolaal wax qiimo ahna leh haddii aan ficil loo badalin.

746, Isticmaal.maskaxdaada waayo noloshu waa waxyaabo yar yar oo xusuus la iskugu geeyay.

747., Guul daradu ma qaraara ilaa aad liqdo.

748, Shaqadu waa miraha rejo oo dhan
749, Isku day inaad fikradahaaga muuqaal u badasho.kadibna ficil.

750, haddii aadan hadaf lahayn kama kama murugoonaysid inaad waxba gaari waysay.
751, Shaqadu waa inaad wax kasta u samaysto si looga faaiidaysto.
752 Shaqadu waa ballan markasta la ilaaliyo.

753, Waxaad noqoto ayaa ka wanaagsan waxaad haysato
754, Wada shaqaynta kooxeed way qaybisaa culayska shaqada, guushana way laban laabtaa.

755, Xiriirka wanaagsan waa qayb ka mid ah guusha.

756, Haddii aan awoodi wayday inaad shaqadaada ku guulaysato is waydii maxaa dhacay ?

757, Wax qoridu waa xirfad aad ku ilaalinayso inaad ku horumariso shaqadaada.

758, Daacad nimadaada waxay riixdaa buuro.

759, Qof kale haku mashquulin wax aad kaligaa samayn karto.

760, Wax kasta oo weyn oo farxad leh waxaa curiyay shaqsiyaad u shaqeeyay si xor ah.

761, Marka hore baro. Xeerarka shaqadaada, kadibna shaqee.

762, Qofna sida toban qof uma caqli badna umana xoog badna.
763 Ma jirto nolol waligeed heer gaartay ilaa ay xoogga saarto Diinta Akhlaaqda iyo Xamaasadda.......

764, Qofna wax ma samayn karo kalsooni iyo rejo la'aan.

765, Nooc kasta oo aad tahay, waxaa jirto dhallin yaro, ay la tahay inaad adigu sax tahay, waxaa kale oo jira shaqo aan waligeed la qabanayn haddii aadan qaban, waxaa kale oo jira meel adiga mooyee aanay jirin cid kale oo buuxin karta.

766, Isku kalsoonida waa sirta ugu horaysa ee guusha.

767, Ha ku qiimayn maalinta dalagga aad soo goosatay, laakiin ku qiimee miraha aad beeratay.

768, Dabkaaga ha u ogolaan inuu baqtiyo, mar kasta qoriga kan ugu wayn siisaar.

769, Wax kasta waqtiga way ku koraan marka laga reebo wahsiga.

770, Toogo dayaxa, haddii aad la gafto, Xidigaha ayaa mid la helaysaa.

**771, Haddii aan dhab ahaantii doonayso in aad wax samayso, waxaa aad helaysaa waddo, haddii aadan doonayna waxaad helaysaa marmarsiinyo.**

**772, Marka aad hurdo fiican ka soo kacdoba waxaa ku qabanaysa shaqo ma doonataa..**

**773, Guul darada ku dhacda dad badan noloshooda waxaa ay ka timaadaa, iyaga oo aan hubin sida ay ugu dhawayd guusha markii ay niyad jabeen.**

**774, Haddii aadan garanayn meesha aad u socoto bas kasta ayaa ku gayn kara meeshaas.**

**775, Waqtiga oo aad lumisaa waxaa uu ku dhammaadaa shalaay.**

**776, Abaal marinta shaqada wanaagsan waa shaqo kale.**

**777, maalin aan shaqo lahayn waa maalin aan cunto lahayn.**

**778, Sirta guusha waa in aad fasaxaaga ku beegato fursadahaaga kale ee shaqo.**

**779, keliya kuma filna inaad sida quraanjada mashquul u noqoto, Su'aashu waa maxaa mashquul ku tahay.?**

**780, Waqtigii ugu haboonaa ee ay ahayd in geed mirood la beero waxay ahayd 20 sano ka hor, waqtigii labaad ee ku haboonaana waa maanta.**

**781, Qofka wax kasta sababeeya waxaa hormarka kaga dhaw Qofka sabab la' aan waxkasta sameeya**

782, Marka aan subax kasta tooso waxa aan eegaa liiska magacyada dadka aduunka ugu taajirsan, haddii aanan ku jirin waxa aan u kalahaa shaqo.

783, Wada shaqaynta kooxeed waa muhiim waayo waxa aad helaysaa qof aad eedayso.

784, Qofna waligii kuma maashoobin dhididkiisa.
785, Shini la'aan waa Malab la'aan, Shaqo la'aana waa lacag la'aan.

786, Shaqo wanaagsan oo kasta waxaa loo qabtaa Sida quraanjada aayar aayar.

787, Kuwa sida ugu xun u isticmaala waqtigooda, ayaa inta badan ka cawda in waqtigu ku yar yahay.

788, Sababta uu welwelku u dilo in ka badan inta ay shaqadu dhisho, waa dadka inta welwesha ayaa ka badan inta shaqaysa.

789, Xabadda shumaca hadaad labada dhinac ka shido. Sida aad u malaynayso uma iftiimayso.

790, Marka aad Bataati Ilaahey ka barido qaado Yaambada.

791, Haddii aad beer falato waa in aad dhididkaaga ku waraabisaa.

792, Dhidid la'aan waa daacad la'aan.

793, Welwelka maanta ma nadiifiyo murugadii berito ee wuxuu Wiiqaa Awoodda maanta.

794, Haddii aad shaqadaada nacday maad sidaa sheegtid halkaan waxaa jira Koox Caawisa dadka dadka shaqooyinkooda naca, Waxaana lagu magacaabaa Qofkasta xafiiskooduna waa maqaaxiyaha.

795, Shirarka waxaa ku dhashay fikrado waaweyn, sida oo kale waxa ku dhinta in badan oo aaraaha xun xun ah.

796, Dad badan waxa ay wax ku bartaan qaladaadkooda haddii aanay isku mashquulin in ay dafiraan.
797, Waligeed lama arag lamana maqlin qof shaqo adag u dhintay.

798, Tabar la'aanta badanaa samirka ayaa lagu kahaa.

799, Waxa kala duwan inaad joogto shaqada iyo in aad shaqaynayso.

800, Qorshe kasta oo uu qof samaysto, waxaa jira caqabado meel ugu qarsoon.

801, Ka baro wax qaladaadka dadka kale, kuma filna noloshaada in aad qaladaadkaaga wax kasta ka barato.

802, Habka ugu gaaban ee aad howlo badan ku qaban karto waa in aad markiiba hal hawl ebido.

803, Samee waxa saxda ah, inta aad isku dayayso in aad wax kasta sax u samayso.

804, Hormarka oo dhan tijaabo ayuu ku yimaadaa.

805, Aduunyada waxa la yiri iyo waxa la qabtay waxa badan waxa la yiri.

806, Waxa jira dadka labo qof oo sax ah, Qof waa uu dhintay midna wali ma dhalan.

807, Shaqo si xun loo qabtay waa in laba mar la qabtaa.

808, Xusuusnoow Waqtigu waa lacag.

809, Hadal buurta ma riixo ee hawlaa riixda.
810, Sirta ku jirta Cimriga dheer waa laba shaqayn, Lixdanka hore oo shaqo adag ah iyo 30-ka dambe oo shaqo caadi ah.

811, Haddii aadan doonayn inaad sii shaqayso, waa in aad si adag u shaqaysaa, si aad lacag kugu filan u hesho. kadibna aad shaqada iskaga dayso.

812, Difaaca shaqadaada ugu wanaagsan maaha in aad ku tiirsanaato urur shaqaale, laakiin sidii waa in aad ku tiirsanaato kaydkaaga.

813, Dadku waa ay ilaawaan sida dag dagga ahayd ee aad shaqada u qabatay, laakiin waxay xasuusan yihiin sida wanaagsan ee aad shaqada u qabatay.

814, Ilaaheey ma jecla qofka quusta.

815, U shaqee si aad u noolaato.

816, Haddii aadan doonayn in aad wax sameyso, Cudur daar kasta wuu ka sii wanaagsan yahay kan kale.

817, U gudo shaqadaada si ka wanaagsan, sida uu qof kasta u samayn karo, taasi taasi waa difaaca ugu wanaagsan ee shaqadaada.

818, Qofka ku tiirsan miiska qofka kale wuxuu qadeeyaa xilli dambe.

819, waxbana sharciga kuma ahan mamnuuc, haddii ay boqolaal ganacsato ay sameeyaan.

820, Wuu nasiib badan yahay qofka aan xirfad u lahayn baagamuundeyn.

821, Shaqo la'aanta badan waa xididaha shaydaanimada.

822, Waxaa faraxsan qofka shaqeeya waxaana Qadiinsan kan wahsilowga ah.

823, Mala' awaalku waa uu ka muhiimsan yahay aqoonta, waayo aqoontu waa wax kooban, mala awaalkuna waxa uu koobaa dunida.

824, Haddii uu qofku haysto shaqo muhiim ah, waqti firaaqo ah iyo dakhli ku filan oo soo gala ilmo aadam isaga ayaa ugu faraxsan.

825.Waxaan doonayaa in aan qof uun noqdo laakiin waa in aan qiixaa qofkaa.

826, Anigu ma aanan guuldaraysan oo keliya, ee waxaan ogaadey inay jiraan 10,000 oo hab oo aana shaqaynayn.

827, Kuwa ku tala gala guuldaro wayn ayaa gaaraan guul wayn

828, Kursiga xurnimada waxaa loo dhigaa qofka ku nool shaqadiisa.

829, Qofka garanaya "Sida" ayaa markasta shaqo helaya shaqo, qofkase garanaya "Sababta" waxa uu noqonaya maamulahiisa.

830. Shaqadu waa raaxo ama dhibaato, taasi waxay ku xiran tahay dhaqankaaga.
831, Jawaabaha oo dhan inaad hayso waxa ka wanaagsan in aad qaar ka mid ah su'aalahooda hayso.

832, Noloshu way ka gaaban tahay in aad shaqo kasta adigu qabato, qaar ka mid ah shaqooyinkaga dad kale sii.

833, Billowga fiican waa dhamaystir barkii.

834, Nolol Shaqo la aan ah waa Cadaab.

835, Si aad wax u hormariso, marka hore hormari maskaxdaada.

836, Qofka Ilaahey ayaa abuura laakiin shaqada ayaa mid wanaagsan ka dhigta.

837 Shaqadu waa shaqo haddii lacag lagugu siiyo, waana farxad hadaad lacag ku bixiso si loo sameeyo.

838, Ha ka baqin in ay fikiradaadu noqoto wax qallafsan, waayo fikrad kasta oo hadda wanaagsan waxa ay soo martay waqti ay qallafsanayd.

839, Qofka aan shaqada gacmaha ka qabanayn waxaa ma suurta galaayaan ma yaqaano.

840, Qofkasta himilada la siiyo inta ay le'eg tahay ayaa ay la egtahay awooda la siiyo ee uu ku dhabeyn karo.

**841. Shaqadu waa soo bandhigidda awoodeenna.**

**842, Guusha ugu saraysa waa khad madow oo u dhaxaysa shaqada iyo ciyaarta.**

**843, Kuwa badala adduunka waa kuwa si caadi ah u joogteeya fikradahooda.**

**844, Jebi xeer kasta oo ay dhigatay shirkadda aad u shaqayso marka laga reebo mid kan soo socda: iska ilow xeerka hore, haddii aad dooneyso inaad halkan kasii shaqayso.**

**845 Dhibaato meel ay kaasoo gasho maleh, haddii uu qorshe hawleed kaagu buuxo toddobaadka oo dhan.**

**846, Marka aad carooto tiri toban, ka hor inta aadan hadlin, haddii aad saaid u caraysantahayna tiri ilaa boqol.**

**847, Marka ay shaqadaadu iska hadasho ha aamusin.**

**848, Koox ka kooban Saddex Shaqo way qaban karaan haddaan labo ka mid ah la waayin.**

**849,Qofna isma dhagaysan karo shaqo la'aan**

**850, Dadku waxay u qaybsamaan laba qaybood, qayb shaqaysa iyo qayb amaan doonaysa, isku day inaad ka mid noqotid qaybta hore, waayo meeshaas tartan kama jiro.**

**851, Rajadu waa shidaalka nolosha.**

**852, Ha niyad jebin qof, waayo badanaa furaha ugu dambeeya waa kan fura qufulka.**

853, Daahfurku waxaa la yiri waa lama filaan la kulmay maskax diyaarsan.

854, Haddii uu rabitaan meel kuu kexeeyo, u ogoloow inay sababtu kaa joojiso.

855, Guushu waa macaan, marka aad garanayso guuldarada.
856, Isku day oo guuldarayso, laakiin haku guuldaraysan inaad mar kale isku daydo.

857, Maalin kasta waxbaad barataa hadaad u fiirsato.

858, marka ay rabitaanka iyo xirfadu wada shaqeeyaan ayaa la rajeyaa shaqo qurux badan.

859, Guuldarada ku dhacda dad badan noloshooda waxa ay ka timaadaa, iyaga oo aan hubin sida ay ugu dhawayd guusha marka ay niyad jabeen.

860, Guushu waxa ay la socotaa erayga WAAN AWOODAA, guuldaraduna erayga MA AWOODO.

861, Guushu waa arrin aad ku adkeysatay sii wadideeda kadib markay ka hareen dad badan.

862, Maamule cusub waa sharci cusub.

863, Waligaa haka shakin in fikrado yar yar oo ay la jiraan rabitaan ay wax badali karaan.

864, Xirfadu waa shaqo in badan socotay.

865, Noloshu 10% waa waxa kugu dhaca 90%kiina waa sida aad uga jawaab celiso.

**866, Kala soocidda waxa aan samayno iyo waxa aan samayn karno, waxa ay ku filan tahay inay xal u noqoto dhibaatooyinka adduunka ugu weyn.**

**867, Waxaa jira laba nuuc oo dad ah, kuwo aan samayn karin waxa loo sheego iyo kuwo aan aqoon waxa loo sheego mooyaane wax kale.**

**868, Daawada kaliya ee murugta loo haayo waa shaqo.**

**869, Guuldaradu maaha inaad wax ku guuldaraysato ee guul daradu waa haddii aad isku dayi waydo.**

**870, Geesigu waa kan garanaya sida loo adkaysto daqiiqad ka hor guusha.**

**871, waxaa jira laba guuldarays, kuwo ku fikira wax hadana aan samayn iyo kuwa sameeya iyagoo aan fekerin.**

**872, Dadku waxa ay bilaabaan in ay guuleystayaal noqdaan, daqiiqadda ay goostaan sidaa.**

**873, Ma awoodaa inaad gaadho hadafkaaga adiga oo aan cadow samaysan.**

**874, Waligaa gadaal ha eegin adiga oo caraysan, horayna ha eegin adiga oo baqaya, laakiin hareeraha eeg adiga oo feejigan.**

**875, Marka aad ku timaado jidgooyada nolosha raac wado kale oo qarda jeex ah.**

**876, Xusuusnoow maanta waa berridii aad shalay ka welwelaysay.**

877. Qaado waqti aad wax qorshaysato, laakiin marka uu yimaado waqtigii wax qabadka jooji fikirka oo ku dhaqaaq.

878,, Haddii aadan himilo lahayn hormar ma gaaraysid.

879, Gooso go'aan ah in aad waxa u dooneyso in ka badan inta aad ka baqayso.

880, Guusha caadiyan waxaa u sabab ah nasiibka. haddii aad doonto guuldarada waydii.

881, Haddii uu markabkagu kusoo xiran waayo dekeda u dabaalo oo kusoo xir adigu.

882, Qofku wuu fuuli karaa meesha ugu saraysa buurta surad balse halkaa guri kama dhisan karo.
883, Guushu ma aha in qofka lagu cambiro meesha uu qofku nolosha ka gaarey, ee waa in lagu cambiraa dhibaatooyinka uu qofku ka gudbey.

884, Keliya u dhig berri waxa aad dooneyso inaad ka dhimato adigoon sameyn.

885, Ha ku sugin guusha fadhi, ee soco la'aanteed.

886, Xikmadaha aan ka barano guuldarada ayaa ka badan kuwa aan ka barano guusha.

887, Wadada guusha waxay kor u fuushaa buuro.

888, Dhadhaabta (Dhagaxda) ugu weyn ee hortaal guusha waa in aad ka baqdaa guuldarada.

889, Wadada guusha waxaa lagu yaqaanaa, had iyo jeer caqabadaha ayaa u badan.

**890, Ogoow dhagaxda ugu badan waxay yaaliin wadada guusha.**

**891, Guushu badanaa waa natiijada ka dhalata, talaabo aadan hubin oo aad dhinaca saxda ah u qaaday.**

**892, waxaa loo baahan yahay in aad sameyso wax aad u yar oo sax ah noloshaada, intii aad sameyn lahayd wax aad u badan oo khalad ah.**

**893, haddii aadan haysan shaqo aadan isku buuqayn wali ma haysatid shaqo.**

**894, Caqabadaha ugu badan waxay yaaliin wadada guusha.**
**895, Himiladu waa hambo qabashada ugu dambeysa ee guul darada.**

**896, Rajo qabka lafteeda ayaa ah qurub ka mid ah farxada.**

**287, Haddii uu mashruucaagu qasaaro markasta cambaareey mid ka mid ah shaqaalahaaga, laakiin yaanu noqon kan ugu maskaxda badan.**

**898. Ka hoos bax maamulahaaga, Ka dibna nasiibkaaga u qabo shukaanta.**

**899, Haddii ay wax qaldamaan sax haddii aad awoodo laakiin ku leyli naftaada in aadan welwelin, waayo welwelku waxba ma saxo.**

**900, Ogow welwelku ma saxayo caqabadihii shalay ee wuxuu wiiqayaa awoodda berri.**

901, In aad isla hal wax ku celceliso dhowr mar damiinimo ma aha. ee waa in aad marba marka ka dambeysa ka sii wanaajisid.

902, Haddii ay dad badani sii ogaan lahaayeen in waxa ay sameynayan ay ku guulaysanayan, badankood waxba ma aanay sameeyeen.

903, Aqoon u lahaashada waxa suurta galka ah waa billowga farxada.

904, Hawl bedeliddu waa nolol galinta shaqada.

905, Guusha dhabta ahi waa in la shaqeeyaa.

906, Waa maxay guushu ? Guushu waa biibiile ay caruuri ku haysato meel qodax badan.

907, Ha u ogolaan naftaada inay ku niyad jebiso, qofkasta oo heer gaaray maanta wuxuu ka soo billaabey meesha aad maanta joogto.

908, Ninka adduunka ugu xoogga badani waa kan kaligiis istaaga.

909, Dadaal waad gaaraysaaye.

910, Guushu kaama foga, laakiin ma raadinaysaa ?

911, Jawaabta ugu gaaban waa waxqabad

912. Qofka aan waxba waydiinin wuu lumaa.

913, Qofka aad wax u yaqaana ayaa aayar u hadla.

**914, Ma garan kartid waxa aad sameyn karto, ilaa aad isku daydo.**

**915, Haddii aad jeceshahay waxa aad sameynayso waad ku guulaysanaysaa.**

**916, Guul darada waxaa lagu dhex qariyay guul, guul kastana waxaa lagu dhex qariyay guul darro.**

**917, Injineerka guri ku dhisa qofkasta taladii, waxa uu dhisaa guri u xoodan sida qaansa roobaadka.**

**918, Sirta guushu waa joogtaynta ujeedada**

**919, 80% ka mid ah guushu waa goob joognimada.**

**920, Fikradaha oo loo badalo awood waa sirta guusha.**
**921, Ha tirin sacadaha aad shaqada galisay ee tiri shaqada aad saacadaha galisay.**

**922, Marka ay caaradu xuubkeeda isku gayso Libaax ayay ku xiri kartaa.**

**923, Si aad u guulaysato waa in aad guuldaraysataa, maxaa yeelay waxaa aad ogaaneysaa waxa aaney ahayn in dib dambe la sameeyo.**

**924, Guushu micnaheeda waa in aad sameyso wixii aad si wanaagsan u samayn karto, wixii kalena aad u dayso qof si kale u samayn kara.**

**925, Marka ay fikradaha oo dhami isku ekaadaan, Qofna ma. fekerayo.**

926, Ka mahadnaq waxa aad maanta tahay, una halgan waxaad dooneyso inaad berri noqotid.

927, Guul daradu waa guul markaynu wax ka barano.

928, Guul daradu waa talaabada ugu horeysa ee guusha.

929, U jejebi hawlaha aan suurta galka ahayn qurubyo yar yar oo la maarayn.karo.

930, Ilaahey wuu ku siiyaa lows, laakiin Qolofta kaagama jebiyo.

931, Maamulka wanaagsan wuxuu ka.wanaagsan yahay daqliga wanaagsan.

932, Hal waxaa ka horeeya eber guushana guul darro.

933, Rashtu kuma siineyso shimbirta, ee waxay kusiineysaa jidhka.

934, Jiilbaa beera geedaha jiilna wuu harsadaa.

935, Haddii ay dabeyshu wadi wayso shireeca doontaada, adigu qaado seebka ee wad doontaada.

936, Qofka u shaqeeya laba maamule, midkood ayuu been u sheegaa.

937, Maalintu waa iniin, dadkuna waa beeraleey.

938, Si aad u gaarto meesha aad dooneyso, waa in aad ka tagtaa meesha aad joogto.

939, Ma jiro waqti la mid ah maanta.

**940, Hormar oo dhan waxaa sameeya dad aan raalli ku ahayn sida ay Markaas wax yihiin.**

**941, Guushu had iyo jeer waxaa laga helaa, baqdinta dhabarkeeda dambe.**

**942, U cabo qofka ku caawin kara.**

**943,Waxaa laga yaabaa inaad ka niyad, haddii aad guuldareysato, laakiin waad rajo beeshay haddii aad mar labaad isku dayi waydo.**

**944, Guushu waxay u dhaxaysaa laba guuldaro dhexdood haddii aadan xamaasadda luminayn.**

**945, Furaha guusha wuxuu saaran yahay saacadda hurda toosinta hoosteeda.**

**946, Ku qiimee guushaada halka aad uga niyad jebtay halka aad gaari laheed.**

**947, Guushu maaha furaha farxadda laakiin farxadda ayaa ah furaha guusha.**

**948, Ilaahey ka bari in aaney guushu kaaga soo hormarin inta aadan u tabaabusheysan.**

**949. Qaacidada guusha waa waqti hore toos aadna u shaqee.**

**950, Markasta oo uu qofka u dhawaado Figta, waa markasta oo uu qofku ogaado in aanay halkaa figta ahayn.**

**951, Hal qof oo wax rumeysan, waxaa uu u dhigmaa 99 qof oo xiisooleyaal ah.**

952, Waxaa wanaagsan in guusha iyo guuldaraduba aaney kama dambays ahayn.

953, Haddii aan la barin qofka waxa uu sameeynayo marka uu guusha helo kadib ma hanan karo Libta.

954, Waligaa haka hadlin guuldaro isticmaal erayada rejo, aaminaad, kalsooni iyo guul.

955, Iyada oo ay jirto madaxnimada iyo hodantinimada hadana nabada iyo shaqada waa kuwa keena farxadda.

956, Sirta ugu wanaagsan ee aad shaqadada ku jeclaan karto waa adiga oo mala'awaala adiga oo shaqo la'aan ah.

957, Guushu wey waartaa, marka aad ku hesho, adiga oo aan burburin xeerarkeeda.

958, Maalinkasta waan cusub nahay.
959, Berri markasta way soo socotaa. maantana weligeed ma noqoneyso shalay.

960, Ilaahey ku mahdi, haddii marka aad subixii toosto haysato shaqo inla qabto ay tahay maalintaa, jeclow ama ha jeclaane.

961, Ha shaqaaleyn qof shaqada u qabanaya lacag, ee shaqaaleysii qof shaqada u qabanaya jacayl.

962, Hay'ad weliba waxa ay leedahay tiro badan oo jagooyin ah oo lagu buuxiyo dad aan ku habooneyn.

963, Fasaxaagu waxaa uu dhammaadaa markaad shaqadaada usoo xiisto.

964, Shaqadu way Ammaantaa qofka.

965, Bar naftada kalsoonida. Oo guulayso Idanka Alle.

966, Bogaadi xitaa hormarka yar.

967, Noqo qof xeelad badan, Qofna ula kac xumaantiisa ha u raadin.

968, Ha buun buunin xoogaaga si aad dadka kale u badasho.
969, Dadka wajigooda fiiri marka aad la hadlayso.

970, Dheh fadlan in badan.

971, Sanad kasta ubaxyo beer.

972, Salaanta adigu la horree.

973, Waad mahadsan tahay in badan dheh.

974, Iibso buugaag qaaliya, xitaa haddii aadan akhrinayn.
975, Wado gaari raqiisa laakiin lahow guri qaaliya.

976, Saamax qofka waayo saamaxaadu waxay burburisaa Cadaawadda waxayna korisaa jacaylka.

977, Khayrka kuligiis waa xishood.

8, Saaxiibka wanaagsan waa qurux xiliga nabadda.

979, Waxaa la yiri Midnimadu waa xoog kala taguna waa Hoog.

980. Waxaa la yiri xaasidka dadka wuu kala gooyaaa.

981. In lacagta aysan qiima lahayn waxaad ogaanaysaa jannada waxaa u badan kuwa faqriga ku ahaa aduunyada.

982. Geedka aad maanta harsanayso dadkii kaa horeeyay ayaa talaalay adiguna u talaal caruurtada geed ay harsadaan dhimashadaada ka dib

983. Riyadu ma ahan midda marka aad hurdayso aad riyooto, riyada dhabta ah waa midda hurdada kuu diida.

984. Ma jiro qof hantiile ku noqday in shaqada uu soo galo 8:00 subaxnimo kana baxo 5:00 galabnimo.

985. Badanaa dadka sumcad inay yeeshaan waxa ay ku qaadataa dhawr iyo toban sano, isla sumcadaasna waxay ku burburi kartaa 5 daqiiqo oo kaliya.

986. Hadiiba aad xisaabin karto lacagtaad wali ogow ma tihid qani ee wali waxaad tahay fakhri.

987. Hadii dadku ay ku faraxsann yihiin adeegaaga iyo shaqadaada ogow waxaad gaartay kala bar hadafkii nolosha.

988. Hadaf kasta oo nolosha ah waan gaari karnaa hadii aan ku qanacsanahay waxa aan markaas haysano.

989, Dumarka waa sida dab oo kale haduu ninku garto sida loo qabsado waxay u iftiimisaa dariiqiisa, hadu garan waayana sida loo qabto waxay gubtaa gacantiisa.

990. Gabadhu wey kuu cafin kartaa hadaad dulmido laakiin kuma cafineyso hadaad muhiimad siin weydo.

**991. Dariiqa ugu fiican ee aad gabadh ra'yigeeda ku bedeli kartaa waa inaad waafaqdo.**

**992. Waxaa ka dhaxeysa cilaaqad jaceyl oo awood badan gabadha quruxda badan iyo nasiibka xun.**

**993. Gabadhu waa sida qaxwaha oo kale hadaad muhiimad siin weydo wey qaboobi xitaa dareemaheeda.**

**994. Ninka gabadha ula dhaqma sida boqoradda oo kale xaqiiq wuxuu kusoo barbaaray gacanta boqorad kale.**

**995. Gabadha quruxda badan waxay ninka soo jiidataa saacado gabadha wanaagsanna waxay saameysaa noloshiisa oo dhan.**

**996. Doqonimo maaha iney gabar rumeysato beentaada laakiin waxaa doqonimo ah inaad raganimo dareento adigoo been usheegaya.**

**997. Markaad wax barto nin waxaad waxbartay qof keliya laakiin markaad gabar wax barto waxaa wax bartay qoys dhameystiran.**

**998. Marka ay gabadhu xanaaqdo waxay lumisaa rubuc quruxdeeda ah, haaf dumarnimadeeda ah iyo dhamaan jaceylkeeda.**

## 999. Makraad la hadlayso gabar, aad udhageyso waxay indhaheedu leeyihiin.

**1000. Waxaan kaaga digayaa inaad been usheegto dumarka , waayo waxay leeyihiin awood cajiib ah inay ogaadaan**

runta iyo awood kasii badan inay qariyaan runta ay ogaadaan.

1001. Dahabka Waxaa lagu tijaabiyaa Dabka , dumarkana waxaa lagu tijaabiyaa dahabka, raggana waxaa lagu tijaabiyaa dumarka.

1002. Aamusnaanta gabadha waa fariin digniin ah oo ay gabadhu u direyso ninka taasoo ah iney ka tuureyso qalbigeeda.

1003. Naxariista gabadha waxay ka awood badan tahay xooga ragga.

1004. Gabadhu wax kasta way usameysaa ninka ay jeceshahay laakiin hadii ay ka shakido jaceylkiisa muhiimad ma siiso.

1005. Yaa yiri dumarka ra'yi malaha? dumarka maalin kasta waxay leeyihiin ra'yi cusub.

1006. Ixtiraam gabadha ama uga tag kan kaa raganimo badan.

1007. Gabadhu waxay noqotaa hooyo markey wax jeclaato maaha keliya markey wax dhasho.

1008. Bara caruurtiina inay dumarka yihiin saaxiib, wadan iyo nolosha oo dhan.

1009. Dumarku ninkay Wax la wadaan wuxuu noqdaa halyey, kii ay lug gooyo la doonaana kama badbaado.

1010. Dumarka sidoodaba waa labo arimood, in aad u samirto iyo in aad ka samirto.

**1011. Saamaxaadda iyo Cafisku waa deeqda ugu weyn ee uu bixin karo qofka dulmani, gafka iyo qaladkuna waa miraha iyo dhaxalka ugu xun ee uun kaydsan karo dulmi falaha ahi.**

—Laabsaalax

**1012. Hablaha waxaan leeyahay Naftaada in aad u doorto nin qurux badan waxaa ka wanaagsan in aad ubadkaaga Aabbe wanaagsan u doorto.**

—Laabsaalax